DOWLAD GOBELEEDKA PUNTLAND

SHARCIGA HORUMARRINTA KHAYRAADKA MACDANTA IYO SHIDAALKA PUNTLAND

Golaha Wakiillada Dowlad goboleedka Puntland;

- ka dib markii uu ka baarandegay dasttuurka Dawlad Goboleedka Puntland;

- Asaga oo ku dhaadanaya go'aanka shacabka Puntland oo ah inay ka mid ahaadaan Dawlad Federaal ah oo Soomaaliyeed;

- Asaga oo aqoonsan wadaagga mas'uuliyadda ilaalinta iyo jahaynta ka fa'iidaysiga khayraadka dabiiciga ah ee ku iira geyiga Puntland, iyo sidoo kale wadaagga xuquuqda ka dhalata ka faa'iidaysiga khayraadkaas oo ay wada leeyihiin Dawladda Federaalka ee Ku-Meelgaarka ah iyo dawlad Goboleedka Puntland;

- Asaga oo garwaaqsan baahida loo qabo raasumaal malgelineed oo aan looga maarmayn maalgeliyayaal ajnabi ah oo u baahnaanaya dammaanad sharci;

- Ka dib marka uu garwaaqsaday laga maarmaannimada hannaan sharci oo meelaynaya mas'uuliyadaha iyo xuquuqda ku lammaan ka faa'iidaysiga khayraadkaas;

- Asaga oo uu mudnaanta siinaya u horseedidda shacabka Puntland iyo guud ahaan kan Soomaaliya sidii

ay u gaari lahaayeen horumar nololeed oo dhan walba ah.

Wuxuu meelmariyay Sharciga Horumarinta Khayraadka Macdanta iyo Shidaalka Puntland oo ay ku dhanyihiin wax kasta oo la xariira tix-raacyada sharci ee ka fa'iidaysiga khayraadka Macdanta iyo Shidaalka Puntland.

INDEX

QAYBTA KOWAAD

EREY BIXINTA (s1)

Qodobka 1aad Erey Bixin

QAYBTA LABAAD

Qodobka 2aad: Dhulka sharcigan gaarsiisan yahay

Qodobka 3aad: Agabka sharciga

Qodobka 4aad: Gacan ku haynta khayraadka shidaal iyo macdaneed ee Puntland

Qodobka 5aad: Sharciyada ruqsadaha sahminta macdan soo saarida, baaritaanka ama soo saarida, iyo xuquuqda ay yeelanayaan haystayaasha

Qodobka 6aad: Mabaadii'da ku dhaqanka cadaalada

Qodobka 7aad: Latashiga dhinacyada danaynaynaya iyo kuwa uu saamaynayo.

QAYBTA SADEXAAD.

MAAMULKA IYO ISKAASHIGA LALA YEELANAYO HAY'ADAHA FEDERAALIGA AH. (ss8-13)

Qaybta 8aad: Egmasho iyo xilsaarid

Qodobka 9aad: Qaabdhismeedka WTM:

Qodobka 10aad: Dejinta stratiijiyada siyaasadeed

Qodobka 11aad: Qaybsashada dakhliga

Qodobka 12aad: Dib u Habaynta mashaariicda Macdanta iyo shidaalka soomaliya.

Qodobka 13aad: Shuruudaha iskaashiga

QAYBTA AFRAAD.

OGOLAANSHO. (ss14 -45)

Cutubka 1: Qodobada guud

Qodobka 14aad: Kala qoqobida dhulka

Qodobka 15aad: Soohdimaha

Cutubka 1: Fasaxa indhaindhaynta (ss 6–8)

Qodobka 16aad: Arjiga fasaxa indhaindhaynta

Qodobka 17aad: Bixinta iyo mudada fasaxa indhaindhaynta.

Qodobka 18aad: Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha fasax indhaindhayn

Cutubka 2 – Ogolaansho mcadan soo saarid.(ss 9–24)

Qodobka 19aad: Cutubka codsiga.

Qodobka 20aad: Arjiga ruqsada sahminta

Qodobka 21aad: Ogolaanshaha iyo mudada fasaxa sahminta.

Qodobka 22aad: Arjiga cusboonaysiinta ruqsada sahminta.

Qodobka 23aad: Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha ruqsad sahmin

Qodobka 24aad: Ogolaanshaha la bixida iyo isticmaalka macdanta.

Qodobka 25aad: Arji Macdan soo saarid.

Qodobka 26aad: Ogolaanshaha iyo mudada ruqsada macdan soo saarid.

Qodobka 27aad: Arji cuboonaysiin macdan soo saarid.

Qodobka 28aad: Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha ruqsad macdan soo saarid.

Qodobka 29aad: Arjiga fasaxa iyo muddada ruqsada macdan soo saaridda kooban

Qodobka 30aad: Arji fasax ceshiimo

Qodobka 31aad: Oggolaanshaha iyo muddada fasax ceshiimo

Qodobka 32aad: Arji cuboonaysiin fasax ceshiimo

Qodobka 33aad: Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha fasax ceshiimo

Qodobka 34aad: Fasax ceshiimada lama wareejin karo.

Cutubka 4; Oggolaanshaha shidaalka

Qodobka 35aad: Cutubka arji qorashada .

Qodobka 36aad: Casumaada arjiyada.

Qodobka 37aad: Codsi ruqsad baaritaan

Qodobka 38aad: Oggolaanshaha iyo muddada ruqsada baaritaanka

Qodobka 39aad; Arji cusboonaysiin ruqsad baaritaan.

Qodobka 40aad: Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha ruqsad baaritaan

Qodobka 41aad: Arji wax soo saar

Qodobka 42aad: Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha ruqsad Wax soo saar

Qodobka 43aad: Arjiga cusboonaysiinta ruqsad wax soo saarka

Qodobka 44aad: uquuqda iyo waajibaadka haystaha ruqsad wax soo saar

Qodobka 45aad: Hurumarrinta bar kayd ee shidaalka

QAYBTA SHANAAD

XEERARKA GUUD EE ANSIXINTA ROYALTISKA, CASHUURAHA, IYO KHIDMADAHA.

Cutubka1. Arimaha dhaqaalaha

Qodobka 46aad: Royaltiska Qaranka.

Qodobka 47aad: Cashuuraha.

Qodobka 48aad: Khidmadaha

Qodobka 49aad: Kirooyin.

Qodobka 50aad: Dhiirigelinta horimarrinta

Qodobka 51aad: Ilaalinta Sarifka

Qodobka 52aad: Equity Participation by the Government of Puntland

Cutubka 2: Arimaha Maamulka.

Qodobka 53aad: Joogtaynta xafiis iyo wakiil

Qodobka 54aad: Qaabka kala doorashda arjiyada

Qodobka 55aad: La kala wareegida iyo ishortaagida ruqsadaha sahaminta iyo macadn soo saarida

Cutubka 3: Isticmaalka dhulka iyo kaabayaasha

Qodobka 56aad: Kaabayaasha horay u jiray iyo wadaagga kaabayaasha

Qodobka 57aad: Socodsiinta howgaladda

Cutubka 4aad: Arimaha deegaanka.

Qodobka 58aad: Mabaadi'da Maareynta daaegganka

Qodobka 59aad: Bixinta maaliyadda ka soo kabashada dhawwacyada deegaanka gaara

Qodobka 60aad: Caafimaadka, amaanka iyo dhowrista deegaanka

Qodobka 61aad: Shaqaalayn, tababarka, iyo dalabka adeega gudaha

Cutubka 5: Joojinta howgaladda

Qodobka 62aad: ku meelgaarnimada Dhismayaasha

Qodobka 63aad: Dhamaadka xaq, oggolaansho, iyo ruqsad

Qodobka 64aad: Awoodda laalida ama burinta xuquuqda oggolaanshooyinka ama oggolaanshaha ee hay'adda ruqsad bixinta

Cutubka 6: Xadidaada isticmaalka dhulka qaarkiis

Qodobka 65aad: Xadidaada ama mamnuucidda sahminta iyo macdan ka soo saarid dhulka qaarkiis

Cutubka 7: Isticmaalka dhulka

Qodobka 66aad: Bixinta magdhowyada xaaladaha qaarkood

Cutubka 8aad: Diiwaangelinta

Qodobka 67aad: Diiwaangelinta ogolaanshaha

Cutubka 9: Xogta.

Qodobka 68aad: Xogta iyo warbixinta

Qodobka 69aad: Xogta iyo macluumaadka

Qodobka 70aad: Awoodda hay'adda ruqsad bixinta ee la xariira gudbinta xog iyo macluumaad gaar ah

Qodobka 71aad: Bandhigidda xogta

QAYBTA LIXAAD

DHAQAN GELINTA SHARCIGAN (ss 72-80)

Qodobka 72aad: Kormeer joogtaysan

Qodobka 73aad: Awaamiir, hakin iyo tusaalooyin

Qodobka 74aad: Is-hortaag, xannibaad ama ka-hor-imaansho qof idman

Qodobka 75aad: Racfaan qaadashada iyo habraaca hortegidda maxkamadaha

Qodobka 76aad: Xalinta khilaafaadka

Qodobka 77aad: Dembiyada heerka kowaad

Qodobka 78aad: Dembiyada heerka labaad

Qodobka 79aad: Dembiyada Maamul

Qodobka 80aad: Ciqaabaha

QAYBTA TODOBAAD

Xeerar qodobo kale oo qubane ah (ss81-90)

Qodobka 81aad: Xeer hoosaadyo

Qodobka 82aad: Kaabayaasha shidaalka iyo howgaladda shidaal soo saarka

Qodobka 83aad: Isdhaafsiga decumintiyada

Qodobka 84aad: Wakiilashada qandaraasle

Qodobka 85aad: Wax ka bedilida xuquuqda, fasaxyada, barnaamijyada iyo qorshayaasha

Qodobka 86aad: Mulkiile dhul ama cid ku degen si sharci ah oo aan la heli Karrin

Qodobka 87aad: Dhaafitaanka qodobo ka mid ah sharcigan

Qodobka 88aad: Caddaynta xaqiiqada

Qodobka 89aad: U qoolnaanta Xukuumadda Puntland

Qodobka 90aad: Qodobada Ku-Meelgaarka ah

Qodobka 91aad: Dhaqangalka sharcigan

QAYBTA KOWAAD

EREY BIXINTA (s1)

Qodobka 1

Erey Bixin

“Oggolaansho” Waxaa loola jeedaa nooc kasta oo ruqsad sahamin, Ruqsad la xiriirta macdanta iyo ruqsad oggolaansho kooban oo la xiriirta macdan soo saarid, ruqsad haysasho, oggolaansho kayd ama ruqsad wax soo saar oo ku soo baxday si sharciga waafaqsan.

“**Aagga oggolaanshaha** Waxaa loola jeedaa mid kasta oo ka mid ah aaggaga sahminta, macdanta, kaydinta, baarista ama soo saarka ee waafaqsan xaalada jirta.

“**Qayb** ” Waxaa loola jeedaa qayb kasta oo dhulka ka mid ah ee lagu tilmaamay qayb, iyadoo la tixraacayo Cadestral unit oo ay maabka ku muujisay hay’adda ruqsad bixinta kuna taal dhammaan ama qayb ahaan Puntland ama jiida dhaqaalaha ee u gaarka ah, waxaana ku dhan dhinac kasta oo qaybtaas ka mid ah.

"**Cadastral Unit**"	Waxaa loola jeedaa afar gees ka samaynsata is goosyada meediyaanada iyo baaraleelada oo in is le'eg isu jirta.
"**Beel** "	Waxaa loola jeedaa koox bulsho ama shakhsiyaad is raacsan isla markaana leh dano ama xuquuq ay ku sheeganayaan aag cayiman kaasoo ay uga faa'idaystaan si beelnimo ah iyaga oo adeegasanaya heshiis, xeer ama sharci.
"**Maalin** "	Waxaa loola jeedaa maalin shaqo, Kumana jiraan jimcayaasha iyo feestooyinka qaran.
"**WTM** "	Waxaa loola jeedaa Wasaarada Tamarta iyo macdanta ee Puntland.
"**Barnaamijka Horumarrinta** "	Waxaa loola jeedaa barnaamij horumarrineed oo lagu ansixiyey si waafaqsan shuruudaha ruqsada wax soo saarka;
"**Shaqaale** "	Waxaa loola jeedaa qof kasta oo u shaqeeya cid haysata oggolaansho xaqna u leh helitaanka musharka iyo xuquuq noocay doonaaanba ha ahaatee, waxaan ka mid ah qof kasta oo u shaqeeya qandaraasle madax bannaan.

"**Deegaan** "	Waxaa loola jeedaa xaydaab kasta oo dad ku noolyahay kana kooban (i) Dhul, biyo, iyo hawo. (ii) Noole aan ishu qaban, dhir, iyo xoolo. (iii) Qayb kasta ama isku dhafka (i)iyo(ii) iyo wada falgalkooda, iyo (iv) Dhammaan Agabka xayn daabkaas ka jira ee saamaynta ku leh caafimaadka iyo baraaraha dadka.
"**Aagga baaritaanka** "	Waxaa loola jeedaa aagga uu ka koonban yahay qayb ama qaybaha ku tilmaaman ruqsad baaritaan.
"**Howgaladda baaritaanka** "	Waxaa loola jeedaa dib u falaqaynta macluumaad jira, helitaanka iyo falanqaynta macluumaad cusub iyo howl kasta oo la xiriirta kayd qarsoon, tijaabinta ceel qodid iyo qiimayn, ku celcelin tijaabo ceel oo looga gol leeyahay hubinta kayd jira.
"Ruqsad Baaritaan "	Waxaa loola jeedaa xaqa shidaal baarida iyadoo la raacayo shuruudaha ku cad qodobka 38aad ee sharcigan

"**Barnaamijka shaqada baaritaanka** "	Waxaa loola jeedaa shaqada barnaamijka baaritaanka ee la oggolaaday ayna ku cad yihiin howgaladda shidaalka ee ay tahay in laga fuliyo aagga baaritaanka inta lagu jiro muddada ruqsada baaritaanka, Kuwaas oo ay tahay inay ku jiraan tafasiil la xiriirta howgaladda sahminta, marxaladaha qalabka la adeegsanayo iyo qiyaasta kharashka howgaladda iyo sahminta marxaladaha kala gedisan.
"**La-imaanshaha Maaliyadda** "	Waxaa loola jeedaa dammaanad, balan qaad bangi, xisaab la hubo ama lacag cadaan ah oo codsadaha ama haystaha oggolaansho laga rabo inuu la yimaado si waafaqsan qodobada iyo 59. Taas oo dammaanad qaadaysa gacan ku haynta maaliyad ku filan fulinta sahminta, baaritaan ama barnaamijka howgaladda wax soo saarka ee heshiiska ku cad ee sida tooska ah loo fulin karo iyo kuwa u baahan in dib u yagleelid lagu sameeyo aagga oggolaanshaha.
"Howgaladda Wanaagsan ee Aagga Macdanta "	Waxaa loola jeedaa howgaladda iyo hab raacyada ay ku dhaqmaan warshadaha Macdanta ee adduunka ayna adeegsadaan howl wadeeno xigmad u saaxiib ah oo la saanqaada duruufaha iyo

waaya aragnimada howlalaha sahminta iyo macdan soo saaridda, loogana gol leeyahay in la hubiyo.

(a) Dhaqaalaynta khayraadka macdanta oo u baahan adeegsiga habab farsamo oo quman si loo gaaro heerka wax soo saar ee ugu badan oo farsamo iyo dhaqaale ahaamba joogtaysan, iyadoo lala soconayo hoos u dhaca kaydka lana yaraynayo khasaaraha;

(b) Badbaadada howlgalka iyadoo loo adeegsanayo qaabab sugaya amaanka shaqada iyo ka hortaga shillalka ,

(c) Badbaadada deegaanka iyadoo la adeegsanayo habab yaraynaya waxyeelada soo saaridda macdantu u geysan karto deegaanka dabiiciga ah.

“**Howgaladda Wanaagsan ee Aagga shidaalka**”

Waxaa loola jeedaa howgaladda iyo hab raacyada ay ku dhaqmaan shirkadaha shidaalka ee aduunku ayna adeegsadaan howl wadeeno xigmad u saaxiiba oo la saanqaada duruufaha iyo waaya aragnimada howgaladda shidaalka,

loogana gol leeyahay in la hubiyo.

(a) Dhaqaalaynta howgaladda shidaalka oo u baahan adeegsiga habab farsamo oo qumman Lana xiriira soo saaridda Shidaalka iyadoo la adeegsanayo qaabab farsamo iyo dhaqaale ahaanba sugan, iyadoo lala soconayo hoos u dhaca kaydka iyo yaraynta khasaaraha dhulka dushiisa ah.

(b) Badbaadada howlgalka taasoo iyada oo la adeegsanayo qaabab sugaya amaanka shaqada iyo ka hortaga shilalka.

(c) Badbaadada deegaanka iyadoo la adeegsanayo habab yaraynaya waxyeelada soo saaridda shidaalku u geysan karto deegaanka dabiiciga ah.

"**Hayste** "	Waxaa loola jeedaa qofka la siiyey ruqsad iyo ama fasax ku xiriirsan oggolaansho ama qofka jago ahaan ku xiga;
"**Hay'adda ruqsad bixinta"**	Waxaa loola jeedaa Wasiir ama sarkaal WTM oo Wasiirku u wakiishay qayb ama

dhammaan awooddaha hay'adda ruqsad bixinta, si waafaqsan qodobada sharcigan,

"**Macdan** " Marka ficil ahaan loo isticmaalayo, Waxaa loola jeedaa howgal ama shaqo kasta oo looga gol leeyahay hanashada macdan laga helo dhulka dushiisa ama lagala soo baxo dhulka hoostiisa, biyo ama kayd haraa ah, mid duugan ama mid dibad yaala ha ahaato.

"**Macdan** " Ka mid ah ciid, dhagax, mabac, dhooqo, carro iyo macdan kasta oo haraa ah, hase ahaatee Waxaa loola jeedaa walax ah adke, dareere, ama hawo, oo si dabiici ah looga heli karo dhulka korkiisa ama gudihiisa ku aasan ama biyaha hoostooda, kuna samaysmey falgal jiyooloojikal ah waxaana aanay ku jirin.

(a) Biyo aan ahayn kuwa loo adeegsado macdan soo saarid.
(b) Shidaalka, "ama
(c) PEAT peat;

"**Aagga Mcadanta** " Waxaa loola jeedaa aag ku tilmaaman ruqsad ama fasax kooban oo macdan soo saarid.

"**Howgalada macdan soo saaridda** "	Waxaa loola jeedaa howlgal kasta oo la xiriira sharciga macdan soo saaridda iyo howgaladda sida tooska ah loo galo?
"**Ruqsada macdan soo saaridda** "	Waxaa loola jeedaa xaq soo saarid macdan oo lagu oggolaaday si waafaqsan qodobka 26(1) ee sharcigan
"**Barnaamij howleedka macdan soo saaridda** "	Waxaa loola jeedaa barnaamij howled macdan soo saarid oo la oggolaaday ayna tahay in la raaco si sida ugu fiican loogu soo saaro khayraad macdaneed, oo ay tahay inay ku jiraan faahfaahin la xiriirta howgaladda, marxaladaha, qalabka ay tahay in la adeegsado iyo qiyaasta kharashka howgaladda iyo marxaladaha kala gedisan.
"**Wasiir** "	Waxaa loola jeedaa wasiirka macdanta iyo tamarta
"**Howlwadeen** "	Waxaa loola jeedaa howlwadeen si sugan loo magacaabay oo ka tirsan WTM.
"**Howlgal** "	Waxaa loola jeedaa howgal indhaindhayn, sahmin, macdan soo saarid, baaritaan, howlgalo shidaal, ama howlgalo macdan soo saarid oo kooban.

“Hantiile”,	Marka dhul laga hadlayo. (a) waxaa loola jeedaa cidda uu magaciisa ku diiwaangashan yahay; ama (b) Haddii dhulkaas ay leedahay Dowladda Puntland, waxaa loo jeedaa Dowladda Puntland oo ay weheliso cidda degan;
“**Shidaal** ”	Waxaa loola jeedaa dareere, adke, haydrocarbon, ama gaas la shito oo si dabiici ah ugu jira lakkabyada dhulka oo aanay ku jirin, dhuxul dhagaxda, iyo walaxyada kale ee laga miiri karo saliida shidaalka.
“**Kayd shidaal** ”	Waxaa loola jeedaa samays jiyoolojiyadeed oo shidaal ku jiro.
“**Xeerin** ”	Waxaa loola jeedaa arrin sharci ku cad.
“**Safayn** ”	Marka macdan laga hadlayo waxaa loola jeedaa, ka gungaarida, dheegid, adkayn, safayn, calciling, kala saarid, raqdid, hubin, dhiqid, hufid, dhalaalin, ama hawo u rogid.
“**Aagga wax soo saarka** ”	Waxaa loola jeedaa aag ka kooban qayb ama qaybo ku tilmaaman ruqsad wax soo Saar.

"**Howlgal wax soo saar** "	Waxaa loola jeedaa howlgal, shaqo, ama arrin ku xiriirsan baaritaan, qiimayn, horumarrin iyo soo saarid shidaal.
"**Ruqsad wax soo saarid** "	Waxaa loola jeedaa xaqa la xiriira shidaalka ee waafaqsan shuruudaha qodobka 42aad.
"**Barnaamij howleed wax soo saar** "	Waxaa loola jeedaa barnaamij howleed wax soo saar oo la oggolaaday oo ayna ku caddahay howgaladda shidaal oo ay tahay in laga fuliyo aagga wax soo saarka ayna tahay inay ku jiraan tafaasiisha la xiriirta howgaladda, marxaladaha, qalabka ay tahay in la adeegsado, iyo qiyaasta kharashka, howgaladda iyo marxaladaha kala gedisan.
"**Sahmin** "	Waxaa loola jeedaa raadinta, iyadoo loo adeegsanayo qaab kasta oo lagu heli karo, macdan kasta oo; (a) Ku firirsan sagxada dhulka, ku jira biyaha hoostooda; ama. (b) Oo ku jirta kayd haraa ah si loo ogaado noocyada macdaneed ee kaydku ka kooban yahay iyo qiimaha dhaqaale ay leeyihiin.
"**Aagga**	Waxaa loola jeedaa aag dhulka ka mid ah

sahminta"	oo hoos yimaada ruqsad sahan.
"**Howgaladda sahminta**"	Waxaa loola jeedaa howlfulin kasta oo ku xiriirsan sahmin;
"**Ruqsada sahminta** "	Waxaa loola jeedaa xaqa sahminta macdanta oo lagu bixiyey si waafaqsan qodobka 21(1).
"**Barnaamij howleedka sahminta** "	Waxaa loola jeedaa barnaamij howleed sahmin oo ay tahay in la raaco si loo hubiyo macdan kasta oo ku jirta aagga sahminta inta lagu jiro muddada ruqsadda oo ay ku jiraan tafaasiil la xiriirta howgaladda, marxaladaha, qalabka ay tahay in la adeegasado iyo qiyaasta kharajka howgaladda iyo marxaladaha kala gedisan.
"**Puntland"**	Waxaa loola jeedaa dhulka ku cad dastuurka, ay ka mid yihiin jiid kasta oo ka mid ah dhulka Somalia ay isku hayaan Puntland iyo dhinacyo kale.
"**Howlgal indha-indhayn** "	Waxaa loola jeedaa howgal kasta oo la xiriira raadinta macdan ama shidaal iyadoo la adeegasanayo farsamo jiyoolojiyeed, geophysical, sawirqaad jiyoolojiyeed, waxaana ka mid ah farsamooyinka shucaaca fog, hase ahaatee kuma jiraan

howlgalo sahmin iyo baaritaan.

"**Oggolaansho indhaindhayn** "	Waxaa loola jeedaa oggolaansho lagu bixiyey si waafaqsan qodobka 17(1).
"**Kayd** "	Waxaa loola jeedaa xog la kaydiyey, iyadoo aan loo eegin qaabka iyo qalabka lagu kaydiyey.
"**Xeer** "	Waxaa loola jeedaa xeer kasta oo lagu sameeyo si waafaqsan qodobka 81aad.
"**Kayd haraa ah** "	Waxaa loola jeedaa kayd kasta oo harsan marka uu dhamaado ama la buriyo ruqsad sahmineed, ruqsad macdan soo saarid, oggolaansho macdan soo saarid oo kooban, ama wax kasta oo ka hara howlgal kasta oo aan ku jirin shuruudihii oggolaanshaha.
"**Haraala biiriyey**"	Waxaa loola jeedaa jajabyada, qubid, discard, tailings, slimes, screening, slurry, dhagax la tuuray, ciid, haraa warshadeed, dambas ama walaxo kale oo laga dheegey ama ka dhasha howgaladda macdan soo saaridda meela lagu ururiyey, bakhaar la geliyey ama la biiriyey, si mar dambe loo isticmaalo ama uu qubay hayste ruqsad macdan soo saarid, macdan soo saarid

kooban, ama wax soo saar.

"**Aagga ceshiimo** "	Waxaa loola jeedaa aag dhul ah oo ku ceshiimaysan oggolaansho ceshiimo.
"**Fasax ceshiimo** "	Waxaa loola jeedaa fasax kasta oo lagu bixiyey si waafaqsan qodobka 31(1).
"**Royal-tiyada Dowladda**"	Waxaa loola jeedaa royalty kasta oo ay qaadi karto xukuumadda Puntland si waafaqsan sharcigan.
"**fasax macdan soo saarid kooban** "	Waxaa loola jeedaa fasax lagu bixiyey si waafaqsan qodobka 29(3) ee sharcigan.
"**Howlgal macdan soo saarid kooban** "	Waxaa loola jeedaa howlgal kasta oo la fuliyo iyadoo la raacayo fasaxmacdan soo saarid oo kooban.
"**Sharcigan** "	Waxaa ka mid ah xeerarka.

QAYBTA LABAAD

MABAAD'IDA ASAASIGA AH (ss 2-7)

Qodobka 2

Dhulka sharcigan gaarsiisan yahay

Sharcigani wuxuu gaarsiisan yahay dhulka puntland iyo meelaha laysku hayo oo ay puntland dhinac ka tahay is hayntaas.

Qodobka 3

Agabka sharciga

1) Sharcigan wuxuu ku saabsan yahay howlagalada shidaalka ha ahaadeen kuwa ay wadaan shirkado dowladeed, ama kuwa gaar ah, ha ahaadeen kuwa dad soomaaliyeed leeyihiin ama ajnabi.

2) Howl kasta oo la xiriirta howgaladda shidaalka ee puntland, waxaa xeerinaya sharcigan

Qodobka 4

Gacan ku haynta khayraadka shidaal iyo Macdaneed ee Puntland

1) Khayraadka shidaal iyo macdaneed ee Puntland waa dhaxal ay wadaaggaan dhammaan shacabka Puntland, waxaana leh dowladda Puntland. Xukuumadda Puntland waa gacan ku hayaha khayraadkaas iyagoo ugana faa'ideynaya shacabka Puntland.

.

2) Iyadoo ah gacan ku hayaha khayraadka shidaal iyo macadeed, xukuumadda Puntland oo adeegsanaysa hay'adda ruqsad bixinta, waxay awooddaa-

   (a) Siinta, bixinta , diidmada, hubinta , maamulidda iyo maaraynta oggolaansho kasta' iyo

   (b) Qarraridda khidmad kasta iyo tixgelin kasta ee laga

qaadayo cid kasta oo mutaysata xuquuqda sharcigani dammaanad qaadayo.

3) Hay'adda ruqso bixintu waa inay awoodeheeda u fulisaa qaab sugaya.

a) Horumarrin joogtaysan ee khayraadka macdaneed iyo shidaal ee Puntland si yaraynaysa waxyeelada deegaanka dabiiciga ah, dhaqaale ahaan joogtaysan, dhiirigelinaysa maalgelinta, gacan ka gaysanaysa horumarka waqtiga fog ee Puntland iyo soomaaliya.

b) Maarayn khayraad oo maangal ah.

c) In khayraadka iyo shidaalka loo horumariyo qaab waafaqsan howgaladda wanaagsan ee goobta shidaalka, iyo howgaladda wanaagsan ee macdan soo saaridda.

Qodobka 5

Sharciyada ruqsadaha sahminta macdan soo saaridda, baaritaanka ama soo saaridda, iyo xuquuqda ay yeelanayaan haystayaashu

(1) Ruqsadaha sahminta macdan soo saaridda, baaritaanka ama soo saaridda, ee lagu ogolaado si waafaqsan sharcigan waa xaq ku kooban oo la xirrira macdan ama shidaal iyo dhulka la xiriira isla xuquuqdaas.

(2) Haysataha ruqsad sahan macdan soo saarid, baaritaan

ama soo saaridda, ogolaado, la wareego ama la siiyo haystahaas si waafaqsan sharcigan ama sharciyada kale ee jira;

(3) Iyadoo la raacayo sharcigan hayste kasta ee ruqso sahan, baaritaan ama soo saarid waxaa u bannaan-

(a) Gelidda dhulka uu ruqsada u haysto isagoo ay wehiliyaan shaqaalihiisa, wuxuuna gayn karaa warshad kasta, aalad kasta, isla markaana wuxuu ka dhisi karaa sagxada iyo dhulka hoostiisaba kaaba kasta oo ay u baahnaan karaan howgaladda sahminta, macdan soo saaridda, baaritaanka ama wax soo saarka oo ay ka mid noqon karaan, waddooyin, isgaarsiin,iyo dhalinta tamarta;

(b) Sahmin, macdin soo saarid, baaritaan ama soo Saar, hadba tii u furan, macdan kasta ama shidaal kasta oo laga heli karo sagxada ama dhulka hoostiisa ee dhulka uu ruqsada u haysto ;

(c) Soo saaridda iyo habaynta macdan kasta ama shidaal kasta oo la helo inta ay socdaan howgaladda shaminta, macdan soo saaridda, baaritaanka ama soo saaridda.

(d) Isticmaalidda biyaha durdurrada, harooyinka, webiyada ama togagga laga helo ama mara dhulka ruqsada loo haysto ama ceel kasta oo horay uga

qodnaa loona isticmaalo sahminta, macdan soo saaridda, baaritaanka ama soo saarka, sidoo kale waxaa u bannaan qodidda ceel gacmeed ama ceel riig iyadoo la adeegasanayo howlo la xiriira sahminta, macdan soo saaridda, baaritaanka ama soo saarka,

(e) Ka Dhisidda aagga oggolaanshaha dhammaan agabyo warshadeed, maamul, degitaan, caafimaad iyo dhisme kasta oo kale oo aan looga maarmin howgaladda; iyo

(f) Fulinta howl kasta oo la soo gudboonaata howgaladda wax ku'oolka ah kuwaas oo aan ka hor imaanayn qodobada sharcigan;

(4) Iyadoo la raacayo faqrada (5)aad ee qodobkan, qofna kuma talaabsan karo, sahmin, macdan soo saarid, howlgal indhaindhayn, baaritaan iyo soo saarid macdan ama shidaal ama blaabidda howlo la xiriira kuwaas, oo laga fulinayo aag Puntland iyadoo aan la haysan oggolaansho dhaqangal noqon kara

(5) Qof kasta oo Soomaali ah iskiis waa u madax bannaan yahay inuu sahmiyo ama baaro asagoo aan haysan ruqsad sahmin ama baaritaan dhul kasta oo aan lagu xirin in loo qaato oggolaansho ama loo codsado oggolaansho.

(6) Haystaha loogama baahna inuu ka helo fasax ruqsad ama oggolaansho xafiis dowladeed oo kale si uu u soo saaro, u

iibiyo, ama u dhoofiyo macdan ama shidaal, haddii uu oggolaansho sharci u haysto ama inuu soo dejiyo badeecad kasta ama uu heshiis la galo dhinacyo kale siduu u helo ruqsad farsamo aqooneed oo howgaladda uu fulinayo u baahan yihiin.

(7) Arimaha ku xusan faqrada (6)ee qodobkan ka saamixi mayso haystaha inuu u hogaansamo sharciyada cashuuraha iyo shuruudaha bangiyada.

Qodobka 6

Mabaadi'da ku dhaqanka cadaaladda

(1) Maamul kasta ama go'aan kasta oo loogu tallaabsado si waafaqsan sharcigan waa in la fuliyo xilli macquul ah, islamarkaasna waafaqsanaado mabaadi'da sharciyada, maangalnimada, iyo habraaca cadaaladda.

(2) Goaan kasta oo laxiriira farqada 1aad qodobkan waa inuu leeyahay qoraal.

Qodobka 7

Latashiga dhinacyada danaynaya iyo kuwa uu saamaynayo

(1) 14 Casho gudahood ka dib marka la aqbalo codsi oggolaansho haya'dda ogolaanshuhu waa in ay.

(a) Baahiso inay heshey codsi oggolaansho ee la xiriira

khayraadka macdanta ama shidaalka ee dhulkaas; iyo

(b) Ka codsato dhinacyada danaynaya ama ay saamaynta ku leedahay soo bandhigida aragtidooda ee la xiriirta codsigaas 30 casho gudahood oo ka bilaabata maalinta la baahiyey.

(2) Haddii qof ka hor yimaado in la bixiyo oggolaansho hay'adda ruqso bixintu waa inay tixgeliso sababaha uu ku diiddan yahay ayna qaadato go'aan ku habboon oo noqon kara diidmo ama oggolaansho.

QAYBTA SADEXAAD

MAAMULKA IYO ISKAASHIGA LALA YEELANAYO HAY'ADDAHA FEDERAALIGA AH (ss8-13)

Qodobka 8

Egmasho iyo xilsaarid.

(1) Wasiirku si qoraal ah ayuu u egman karaa masuul kasta oo ka tirsan WTM, ama awooddaha hay'adda oggolaanshaha ee ku cad ama hoos yimaada sharcigan, marka laga reebo awoodda iyo maaraynta dacwadaha rafcaanka ee waafaqsan qodobka 76, sidoo kale masuul kasta oo ka tirsan WTM wuxuu u xil saari karaa waajibaad kasta oo laga rabo hay'adda oggolaanshaha.

(2) Wasiirku marka uu u egmanayo awood kasta ama uu u

xilsaarayo waajibaad si waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkan wuxuu siin karaa awoodo iyo xilal dheeraad ah cidii kale e uu u cayimo ama u egmado.

(3) Masuul loo egmadey awood ama loo xilsaaray waajib si waafaqsan xeerkaan, si qoraal ah ayuu isla awoodihii loo egmaday ama waajibaadka loo xilsaaray ugu wakiilan karaa masuul kasta oo ka mid ah WTM.

(4) Wasiirka ama masuul wuxuu marka kasta awood u leeyahay.

(a) Inuu la noqdo egmasho ama xilsaarid uu ku talaabsaday isagoo raacaya shuruudaha faqrada (1), (2), ama (3).

(b) Inuu buriyo ama wax ka bedelo go'aan kasta oo u gaaray qof loo egmaday awoodo ama loo xilsaaray waajibaadyo waafaqsan faqradaha (1), (2), ama (3).

(5) Wasiirka ama masuulk Kama ay wareegin gebi ahaanba awooddaha uu cid kale u egmado ama waajibaadyada uu cid kale u xilsaaro.

Qodobka 9

Qaab-dhismeedka WTM.

1. Wasiirka ayaa qaabaynaya wasaaradda una magacraabaya howlwadeenada ay u baahan tahay sida, agaasime,

howlwadeeno sarsare, iyo la -taliyayaal reer puntland ah, soomaali iyo ajnabiaba ah, iyadoo la raacayo qaabka maaraynta ee casriga ah.

2. Dhammaan qaab dhismeedka hada jira xafiisyada , hay'addaha si toosan iyo si dadbanba u hoos yimaada xukuumadda Puntland, islamarkaasna , wasiirka ayaa qaab habboon u dejinaya ama dib u habayn ku samaynaya, isagoo tixgelinaya masuuliyadah ku cad sharcigan.

3. Dahmaan hay'addaha, xafiisyada, xarumaha, oo si toosan iyo si dadbanba xukuumadda puntland u hoos yimaada una xilsaaran inay howlgalo ka fuliyaan jiidaha lagu muransan yahay waxay hoos imaanayaan maamul wadaag ah oo ka dhexeeya Wasaaradda iyo cid ay u xilsaartay xukuumadda kumeel gaar ka ah ee soomaaliyeed, wasiirka iyo cid ay xilsaarto DFKMS ayaana ka masuul ah habaynta iyo dib u habaynta ay u baahan karto howshu tan iyo inta xal laga gaarayo jiidaha laysku hayo.

4. Dhammaan mansabyada Wasaaradda waxaa loo eegayaa xirfadaha kartida iyo waaya'aragnimada ku habboon buuxintooda.

5. Wasiirku mar kasta ay suurtagaltahay wuxuu ku buuxinayaa mansabyada wakaalda muwaadiniin reer puntland iyo soomaliya ah. Markay ka fursanwaa noqoto WTM waxay qaadan karaa shaqaale ajnabi ah.
6. Wasiirku wuxuu meelo ka baxsan Puntland ka samayn karaa

xafiisyo, si loo horumariyo maalgelinta howgaladda Puntland.

Qodobka 10

Dejinta stratiijiyada siyaasadeed.

Xukuumadda Puntland iyadoo ay weheliso xukuumadda federaalka ee kumeel gaarka ah waxay dejinaysaa istraatiijiyada siyaasadeed ee lagu hormarrinayo khayraadka shidaal ee soomaaliya sida ugu faa'idadda badan dadka soomaaliyeed iyada oo la adeegsanayo teknolojiyada ugu casrisan iyo mabaadi'da suuqgaynta Lana dhiirigeliyo maalgelin puntland iyo soomaaliya ee ku saabsan howgaladda macdanta shidaalka.

Qodobka 11

Qaybsashada dakhliga.

Xukuumadda Puntland dakhli kasta oo ku soo gala si waafaqsan sharcigan waxay la wadaageysaa xukuumadda federaalka kumeel gaarka ah iyadoo la raacayo heshiiska ay labada dhinaca wada gaaraan ee la xiriira saamiga boqoleyda ee dakhliqaybsiga.

Qodobka 12

Dib u Habaynta mashaariicda Macdanta iyo shidaalka soomaliya

Xukuumadda Puntland waaxay lsla kaashanaya DFKMS horumarrinta iyo qaabaynta Macdanta iyo Shidaalka soomaaliya.

Qodobka 13

Shuruudaha iskaashiga

(1) Iyadoo aan lagu xadgudbayn xuquuqda dastuuriga ah ee puntland iskaashiga lala yeelanayo DFKMS ee ku xusan Qodobada 10, 11, 12 ee sharcigan, wauxuu ku xiran yahay Xukuumadda federaalka kumeelgaarka.

(a) Heshiis dhamaystiran la gasho xukuumadda puntland kaasoo la xiriira dakhli wadaagga, qaybinta iyo Maamulka macdanta iyo shidaalka.

(b) Dib u habaynta mashaariicda macdanta iyo shidaalka; iyo

(c) Oggolaanshaha awoodda iyo Sharciyada xukuumadda puntland, hay'adda ruqsad bixinta iyo WTM.

(2) Haddii shuruudaha ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan la buuxin waayo sadex bilood oo ka bilaabata maalinta la meel mariyo sharcigan, iyadoo la raacayo sharcigan lana dhowrayo xuquuqda puntland ee ku cad Dastuurka, puntland waxay yeelanaysaa awood gacan ku hayn oo buuxda ee howgaladda, ay ka mid yihiin suuqgaynta. Xaaladda noocaas ah puntland ayaa si buuxda gacanta ugu haynaysa Maareynta dakhliyada ay ku hesho si waafaqsan sharcigan.

QAYBTA AFRAAD.

OGGOLAANSHO (ss14 -45)

Cutubka 1aad: Qodobada guud

Qodobka 14

Kala qoqobida dhulka:

Si loo hirgeliyo sharcigan, hay'adda ruqsad bixinta waxay puntland u qaybin doontaa qoqobyo kuwaas oo ku tilmanaan doona **cadastral u**nits.

Qodobka 15

Soohdimaha

Aagga oggolaanshaha wuxuu ka koobnaanayaa dhulka ku jira isla soohdinta aaggaas iyo joog kasta oo dhulkaas hoostiisa ah, iyo jahada ku beegan oo samada ah.

Cutubka 1: Fasaxa indhaindhaynta (ss 6–8)

Qodobka 16

Arjiga fasaxa indhaindhaynta

(1) Qof kasta oo danaynaya inuu hay'adda ruqsad bixinta gaysto arji uu ku codsanaya fasax indhaindhayn, waa inuu

(a) Arji u gudbiyo hay'adda ruqsad bixinta.
(b) Waa inuu arjigu u qoran yahay sida loo tilmaamay. iyo
(c) Waa inay weheliso khidmada loo cayimay oo aan dib u celin lahayn.

(2) Hay'adda ruqsad bixintu waa inay ogolaataa arji lagu codsanayo ruqsad indhaindhayn; haddii

(a) shuruudaha ku cad faqrada 1aad ee qodobka uu buuxiyo; iyo

(b) Aanu jirin qof oggolaansho u haysta macdanta ama shidaalka isla dhulkaas ku jira.

(3) Haddii ay dhacdo inaan arjigu buuxin shuruudaha ku cad faqradaas, hay'adda ruqsad bixintu waa inay 14 casho gudahood qoraal ku ogeysiisaa arji keensadaha una celisaa arjigiisa ama arji keensadaha ay siisaa waqti uu kusoo waafajinaya arjigiisa shuruudihii loo baahnaa.

Qodobka 17

Bixinta iyo muddada fasaxa indhaindhaynta

(1) Iyadoo la raacayo faqrada (2) ee sharcigan hay'adda ruqsad bixintu waa inay bixiso oggolaanshaha indhaindhaynta; haddii.

(a) Arjiiluhu uu heli karo maaliyadda loo baahanyahay uuna leeyahay awood farsamo oo uu ku fulin karo howgaladda la rabo si waafaqsan barnaamij howleedka indhaindheynta ee la rabo in la fuliyo.

(b) Haddii kharashka ku tala galka ah uu ku filan yahay howgaladda indhaindhaynta ee qorshaysan iyo muddada barnaamij howleedka indhaindhaynta: iyo

(c) Haddii aan arji qortuhu aanu ku xadgubayn Qodob muhim ah oo sharcigan ka mid ah.

(2) Hay'adda ruqsad bixintu waa inay diiddo bixinta fasax indhaindhayn haddii arjiiluhu uusan buuxin dhammaan shuruudaha ku cad faqrada (1) aad.

(3) Haddii hay'adda ruqsad bixintu diiddo bixinta fasax indhaindhayn waa inay 30 cashi gudahood ku ogaysiisaa qoraal ahaan arjiilihhii ay go'aanka ka gaartay.

(4) Muddada fasax indhaindhayntu waa laba sano oo aan la cusboonaysiin Karrin.

(5) Ruqsadda indhindhaynta ee haystuhu soo gudbiyey codsi ah in loo cusboonaysiiyo way sii jiraysaa tan iyo inta laga ogolaanayo ama laga diidyo,

Qodobka 18

Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha fasax indhaindhayn

(1) Haystaha fasax indhindhayntu wuxuu xaq u leeyahay, ka dib marka uu la tashado cidda dhulka leh ama si sharciya ku degan inuu tago dhulka uu oggolaanshaha u haysto si

uu u fuliyo howgaladda indhaindhaynta.

(2) Fasaxa indhindhayntu xaq u siin mayo awooddaha.

(a) Howlgalo macdan soo saarid, sahmin, baaritaan, ama soo saarid oo ku aadan khayraad macdaneed ama shidaal uu isla dhulkaas ka fuliyo; ama.

(b) Xaq u gaar ah uu ku codsan karo ama lagu siin karo ruqsad sahmin, macdan soo saarid, baaritaan, ama wax soo saar oo u gooni ah;

Cutubka 2aad – Oggolaansho mcadan soo saarid.(ss 9–24)

Qodobka 19

Cutubka codsiga

Cutubkani wuxuu ku saabsan yahay oggolaanshaha ruqsadaha sahminta, macdan soo saaridda, oggolaanshaha ceshiimada iyo fasax macdan soo saarid kooban.

Qodobka 20

Arjiga ruqsada sahminta

(1) Qof kasta oo doonaya inuu ka codsado hay'adda ruqsad bixinta, ruqsad sahmin waa inuu.

(a) Haya'da ruqsad bixinta u gudbiyaa arji.

(b) Waa inuu arjigu u qoran yahay sida loo tilmaamay, waana inay ku jiraan xogta soo socota.

I. Haddii arjiiluhu uu yahay shakhsi qof ah.

i. Magaca dhalshada oo buuxa, meesha uu ku dhasahay, iyo taariikhda dhalashada.
ii. Mihnaddiisa; iyo
iii. Meesha uu deggan yahay iyo cinwaankiisa.

II. Haddii arjiiluhu uu yahay shakhsi qaanuuni ah.

i. Magaceeda, Jinsiyadda, qaab sharciyeedkeeda, iyo raasumaalkeeda.
ii. Cinwaanka xaruntooda, magaca, cinwaanka iyo wakiilkeeda puntland.

iii. Dokumintiyada soo socda oo wata saxiixa masuul ku habboon oo idman ee hay'addaas.

aa. Nuqulo sharciga asaasida shirkado.
bb. Haddii ay jirto Nuqulo warbixintii sanadkii ugu dameeyey oo ay soo saareen guddiga agaasimayaasha..

cc. Nuqulo xisaab xirka, qiraalka macaashka iyo khasaaraha, warbixinta hantidhowrka, sadexdii sano ee la soo dhaafay haddii ay jiraan.

dd. Liiska magacyada guddiga agaasimayaashaa, oo ay ka muuqato cinwaannadooda iyo jinsiyaddahooda.

ee. Qof kasta oo leh saxiix uu wakiil kaga noqon karo arjiilaha oo la xiriirta howgaladda macdan soo saaridda iyo howlo kale oo puntland kaga xiran.

III. Qorshaha, iyo tilmaamidda aagga sahanka ee arjiiluhu doonayo ayna ku jiraan cadastral units Muhimka ah.

IV. Ogolaanshe kale oo arjiiluhu isla waqtigaas ka haysto ama horay uga haysan jiray puntland.

V. Caddaynta xaalada maaliyadeed, awoodda farsamo, iyo waaya'aragnimada arjiilaha.

VI. Barnaamij howleedka sahminta iyo kharashka arjiiluhu ku talo jiro inuu galo inta lagu jiro muddada ruqsada sahminta.

VII. Xog kasta oo hay'adda ruqsad bixinta ka codsato.

(c) Iyo Khidmada loo cayimay oo aan celis lahayn

(2) Hay'adda ruqsad bixinta waa inay ogolaataa arji sahmin; haddii.

(a) Shuruudaha ku cad farqada 1aad qodobkaan uu buuxiyo; iyo

(b) Aanu jirin qof oggolaansho u haysta macdanta ama shidaalka isla dhulkaas ku jira.

(3) Haddii ay dhacdo inaan arjigu buuxin shuruudaha ku cad faqradaas, hay'adda ruqsad bixintu waa inay 14 casho gudahood qoraal ku ogaysiisaa arji keensadaha una celisaa arjigiisa ama arji keensadaha ay siisaa waqti uu kusoo waafajinaya arjigiisa shuruudihii loo baahnaa.

(4) Haddii hay'adda ruqsad bixintu ogolaato arji, waa inay 14 casho gudahood qoraal ku ogaysiisaa laga bilaabo maalinta oggolaanshaha, in ruqsad qaatuhu la xiriiro cidda dhulka leh ama kuwa si sharci ah ku haysta, ama cidii kale oo ku lug leh islamarkaana soo gubiyo go'aanka wadaxaajoodkooda 30casho gudahood laga bilaabo

maalinta la oggolaaday.

(5) Hayada ruqsad bixinta markay hesho macluumadka ku xusan faqrada 4aad, waa inay gaartaa go'aan 30 casho gudahood.

(6) Hay'adda ruqsad bixinta waxay dadka ogaysiin kartaa ama ku casumi kartaa arjiyo sahmin oo la xiriira aag kasta, ama waxay ku cadayn kartaa ogaysiiskaas xiliga la soo gudbinkaro arjigaas, shuruudaha iyo xaaladaha lagu mutaysan karo oggolaanshaha arjigaas.

Qodobka 21

Oggolaanshaha iyo muddada ruqsada sahminta

(1) Hay'adda ruqsad bixintu waa inay bixiso oggolaanshaha sahminta; haddii

(a) Arjiiluhu uu heli karo maaliyadda loo baahanyahay uuna leeyahay awood farsamo uu lu fulin karo howgaladda la rabo si waafaqsan barnaamij howleedka sahminta ee la rabo in la fuliyo.

(b) Haddii kharashka ku tala galka ah uu ku filan yahay howgaladda sahminta ee qorshaysan inyo muddada barnaamij howleedka sahminta iyo.

(c) Haddii sahmintu aysan noqon mid hawada diqaysa,

ama dhaawacda deegaanka.

(d) Arjiiluhu uu leeyahay awood howlgal, oo dhowri karta caafimaadka iyo amaanka shaqaalaha iyo bulshada; iyo.

(e) Haddii aan arjiiluhu ku xad gudbayn qodob muhiim ah oo sharcigan ka mid ah.

(2) Hay'adda ruqsad bixintu waa inay diiddo bixinta oggolaansho sahmin haddii arjiiluhu uusan buuxin dhammaan shuruudaha ku cad faqrada (1) aad.

(3) Haddii hay'adda ruqsad bixintu diiddo bixinta oggolaansho sahmin waa inay 30 casho gudahood ku ogaysiisaa ajiilaha qoraal ahaan go'aanka ay gaartay iyo sababaha.

(4) Ruqsad sahmin oo la oggolaaday, wuxuu dhaqangal yahay taariikhda la soo saaro.

(5) Ruqsada sahmintu waxay hoos timaadaa sharcigan iyo Sharciyada kale ee dalka, xuquuqaha iyo shuruudaha ogolaanshaha waxay dhaqangal yihiin mudada ku cad ogolaanshaha, taasoo aan ka badan Karrin 5 sano.

Qodobka 22

Arjiga cusboonaysiinta ruqsad sahmin

(1) Hayste kasta ee ruqsad shamineed oo danaynaya inuu ka

codsado hay'adda ruqsad bixinta cusboonaysiin waa inuu arjigiisa.

(a) u gudbiyo hay'adda ruqsad bixinta;

(b) Waa inuu arjigu u qoran yahay sida loo tilmaamay; iyo

(c) Waa inay weheliso khidmada loo cayimay oo aan dib u celin lahayn;

(2) Arji cusboonaysiin ruqsad sahmin waa inuu.

(a) Sheego sababta iyo muddada uu doonayo in loo cusboonaysiiyo.

(b) Soo raacsiiyo warbixin faahfaahsan oo ah natiijadii sannadkii hore, iyo kharashka ku baxay isla sahamadaas.

(c) Soo raacsiiyo warbixin faahfaahsan oo muujinaysa dhaawaca deegaanka ka soo gaaray howlgaladii sahminta, howgaladda la doonayo in lagu dhamaystiro muddada cusboonaysiinta iyo kharashka ku baxaya; lyo.

(d) Qorshe howleedka sahminta oo faahfaahsan ee la qabanayo muddada cusboonaysiinta.

(3) Hay'adda ruqsad bixintu waa inay ogolaataa arjiga dib u cuboonaysiinta ee ruqsada sahaminta haddii arjiiluhu

buuxiyo shauruudaha ku xusan faqradaha (1) iyo (2), iyo haddii haystaha ruqsada sahmintu uu ka soo baxay.

(a) Shuruudihii ruqsada sahmninta isla markaana ku xadgudbin Qodobada muhimka aha ee sharcigan: iyo.

(b) Qorshe howleedka sahminta;

(4) Ruqsada sahminta waa la cuboonaysiin karaa hal mar mudo aan ka badnayan sadex sano;

(5) Ruqsada sahminta ee haystuhu codsado in looo cusboonaysiiyo way sii jiraysaa tan iyo inta laga ogolaanayo ama laga diidyo, xataa ka dib marka uu dhamaado mudadii ruqsada ee kowaad;

Qodobka 23

Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha ruqsada sahminta

(1) In kasta oo ay jiro xuquuqaha ku cad qodobka 5aad ee sharcigan, Dowladda puntland ayaa ahaanaysa gacan ku hayaha dhammaan macdanaha la soo saaro inta ay socdeen howgaladda sahamintu, haystaha ruqsaduna iskiis ama siduu doono uma isticmaali karo

(2) Hay'adda ruqsad bixiintuu way siin kartaa, marka uu codsado haystuhu, lahaanshaha macdantaas markaa ka

dibna haystaha ruqsadu siduu doono ayuu u isticmaali karaa;

(3) Ka sokow xuquuqda ku cad qodobka 5aad, haystaha ruqsada sahmintu. Wuxuu xaq u leeyahay-

(a) Inuu codsado loona oggolaado dib u cusboonayn ruqsada sahminta ee la xiriirta macdanta iyo aagga sahminta uu ruqsada u haysto.

(b) Inuu codsado loona ogolaado ruqsad macdan soo saarid oo la xiriirta macdanta iyo aagga sahminta ee uu ruqsad u haysto. iyo

(c) Iyadoo la raacayo qodobka 24aad wuxuu xaq u leeyahay inuu la baxo isticmaalana macdan kasta oo soo saarideeda ruqso u haysto lagan helo aagga ruqsada muddada sahmintu socoto..

(4) Haystaha ruqsada sahmintu waa inuu.

(a) Bilaaba howgaladda sahminta 120 casho gudahood laga bilaabo maalinta ruqsada sahmintu u dhaqan gasho si waaafaqsan qodobka 21(4) uuna sii wado muddada kororsiimada oo loo golaaday.

(b) Sii aan kala go'lahayn oo firfircoon u wado howgaladda sahminta si waafaqsan barnaamij howleedka sahminta;

(c) Oofiyo shuruudaha ruqsada sahminta, si waafaqsan Qodobada muhiimka ah ee sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka;

(d) Oofiyo barnaamijka maaraynta deegaanka ee la oggolaaday;

(e) Xukuumadda puntland siiyo khidmadaha ruqsada sahminta: iyo.

(f) Bixiyo Royaltiga dowladda ee la xiriirta macdanta uu rartay, iskiisna u isticmaalay mudadii ay socdeen howgaladda sahminta sida ku cad qodobka 46aad;

Qodobka 24

Oggolaanshaha la bixida iyo isticmaalka macdanta

(1) Iyadoo la raacayo faqrada (2), haystaha ruqsad sahmin wuxuu la bixi karaa, rari karaa, isticmaali karaa macdanta uu helay inta uu ku jiray howgaladda sahminta oo waafaqsan ruqsad sahamin, cadadkaas macdanta ah waxaa loogu baahan karaa tijaabo, tilmaamid, ama falanqayn, wuxuu u isticmaali karaa oo keliya marka uu raacay xeerarka ruqsada;

(2) Ruqsad sahmin haystuhu wuxuu dhoofin karaa macdan oo keliya marka loo isticmaalayo tijaabino kale, ka dib markuu

qoraal cadayn ah u gudbiyo hay'adda ruqsad bixinta iyadoo islamarkaana muunad macdantaas ah oo kale lagu hayo puntland;

(3) Ruqsad sahmin haystuhu waa inuu ka helaa hay'adda ruqsad bixinta qoraal oggolaansho ah inta uusan bixin ama u isticmaalin si gaar ah muunado badan oo ah macdan kasta uu ruqsad haystuhu heley inta uu ku jiray howgaladda sahminta si waafaqsan ruqsada sahaminta;

Qodobka 25

Arji Macdan soo saarid.

(1) Qof kasta oo doonaya inuu ka codsado hay'adda ruqsad bixinta, ruqsad macdan soo saarid waa inuu -

(a) Haya'dda ruqsad bixinta u gudbiyaa arji;

(b) Waa inuu arjigu u qoran yahay sida loo tilmaamay, waana inay ku jiraan xogta soo socota;

(i) Haddii arjiiluhu uu yahay shakhsi qof ah;

i. Magaca dhalshada oo buuxa, meesha uu ku dhasahay, iyo taariikhda dhalashada.
ii. Mihnaddiisa iyo.
iii. Meesha uu degen yahay iyo cinwaankiisa.

(ii) Haddii arjiiluhu uu yahay shakhsi qaanuuni ah

i. Magaceeda, Jinsiyadda, qaab sharciyeedkeeda, iyo raasumaalkeeda;

ii. Cinwaanka xaruntooda, magaca, cinwaanka iyo wakiilkeeda puntland.

iii. Dokumintiyada soo socda oo wata saxiixa masuul idman ee hay'addaas.

aa. Nuqulo sharciga asaasida shirkado

bb. Haddii ay jirto Nuqulo warbixintii sanadkii ugu dameeyey oo ay soo saareenguddiga agaasimayaasha.

cc. Nuqulo xisaab xirka, qiraalka macaashka iyo khasaaraha, warbixinta hantidhowrka, sadexdii sano ee la soo dhaafay haddii ay jiraan.

dd. Liiska magacyada guddiga agaasimayaashaa, oo ay ka muuqato cinwaanadooda iyo jinsiyaddahooda.

ee. Qof kasta oo leh saxiix uu wakiil kaga noqon karo arjiilaha oo la xiriirta howgaladda macdan soo saaridda iyo howlo kale oo puntland kaga xiran.

(iii) Oggolaansho kasta iyo xuquuq macadam soo saarid uu arjiiluhu hada haysto ama uu horay uga haysten jirey puntland.

(iv) Caddaynta xaalada maaliyadeed, awoodda farsamo, iyo waaya'aragnimada arjiilaha;

(v) Muddada oggolaanshaha uu doonayo.

(vi) Tafaasiisha kaydka oo ay ku jiraan kayd la hubiyey, qiyaasay, iyo sifooyinka dhabta ah iyo kuwa kiimiko, farsamo iyo macdaneed ee macdanaha.

(vii) Sifaha iyo qorshaha aagga ku tala galka macdan soo saaridda oo u degsan cabir sax ah oo tilmaamaya baraha muhiimka ah ee ku jira xuduuda aaggaas iyo masaafooyinka ay isu jiraan, oo lagu xaqiijiyey sahan xuduudeed oo rasmi ah isla markaana muujinaya calaamadaha muhiimka ah, dhismayaasha, samayska dhulka, iyo tilmaamaha dhuleed, oo ay ka mid yihiin cadastral unit hadi ay jiraan

(viii) Qorshaha iyo horumarrinta wax soo saarka iyo barnaamijka howgaladda macdan soo

saaridda iyo macluumaadyada kale ay u baahato hay'adda ruqsad bixinta;

(ix) Daraasada suurtagalnimada oo tilmaamaysa qiyaasta heerka iibinta, dakhliyada, raasumaalka iyo kharashka howlgalka, qiimadhaca iyo kharashyada laga goynayo, qiyaasta macaashka iyo socsocodka lacagta;

(x) Barnaamijka shaqaalaynta iyo tababarada oo kooban;

(xi) Tafaasiisha kaabayaasha loo baahan yahay.

(xii) Warbixinta qiimaynta saamaynta deegaanka, haddii ay codsato hay'adda ruqsad bixinta;

(xiii) Xogta kale oo ay hay'adda ruqsad bixintu codsato.

(c) Waa inay weheliso khidmada loo cayimay aan dib u celin lahayn

(2) Hay'adda ruqsad bixinta waa inay ogolaataa ariji macdan soo saarid haddii-

(a) Uu buuxiyey shuruudaha lagu soo qaaday farqada 1aad, iyo

(b) Aanu jirin qof oggolaansho u haysta sahmin macdan, macdan soo saarid, macdan soo saarid kooban ama ruqsad ceshiimo, ee macdantaas isla dhulkaas ku jirta.

(3) Haddii ay dhacdo inaan arjigu buuxin shuruudaha ku cad faqradaas, hay'adda ruqsad bixintu waa inay 14 casho gudahood qoraal ku ogaysiisaa arji keensadaha una celisaa arjigiisa ama arji keensadaha ay siisaa waqti uu kusoo waafajinaya arjigiisa shuruudihii loo baahnaa.

(4) Haddii hay'adda ruqsad bixintu ogolaato arji, waa inay 14 casho gudahood qoraal ku ogaysiisaa laga bilaabo maalinta oggolaanshaha, in arjiiluhu la xiriiro cidda dhulka leh ama kuwa si sharci ah ku haysta, ama cidii kale oo ku lug leh islamarkaana soo gubiyo go'aanka wadaxaajoodkooda 30 casho gudahood laga bilaabo maalinta la oggolaaday.

(5) Hay'adda ruqsad bixinta waxay iclaamin kartaa baahin cidii rabta arjiyo sahmin oo la xiriirta aag kasta, ama waxay ku cadayn kartaa baahintaas xiliga la soo gudbinkaro arjigaas, shuruudaha iyo xaaladaha lagu mutaysan karo oggolaanshaha arjigaas.

Qodobka 26

Oggolaanshaha iyo muddada ruqsada macadn soo saaridda

(1) Iyadoo la raacayo farqada (4) aad, hay'adda ruqsad bixinta waxay bixin kartaa ruqso haddii.-

(a) Barnaamijka howlgalka macdan ku salaysan yahay

sidii loo saari lahaa macdanta ugu badan.

(b) Arjiiluhu uu heli karo maaliyadda loo baahanyahay uuna leeyahay awood farsamo uu ku fulin karo howgaladda la rabo si waafaqsan barnaamij howleedka macdan soo saarrida ugu badan.

(c) Maaliyadda u qorshaysan ay ku filan tahay muddada howlgalka macdan soo saaridda; taas oo.

(d) Sahmintu aysan noqon mid hawada diqaysa, dhaawacdana deegaanka.

(e) Arjiiluhu uu leeyahay awood howlgaleed oo ilaalin karta caafimaadka iyo amaanka shaqaalaha iyo shacabka; iyo.

(f) Haddii aan arji qortuhu aanu ku xadgubayn Qodob muhiim ah oo sharcigan ka mid ah.

(2) Hay'adda ruqsad bixinta waa inay diiddo bixinta oggolaansho macdan soo saarid haddii arjiiluhu uusan buuxin dhammaan shuruudaha ku cad faqrada (1).

(3) Haddii hay'adda ruqsad bixinta diiddo bixinta oggolaansho macdan soo saarid waa inay 30 casho gudahood ku ogaysiisaa qoraal ahaan arjiilaha ay go'aanka ka gaartay iyo sababaha keenay.

(4) Arjiga macdan soo saaridda ee la oggolaaday wuxuu dhaqangal yahay maalinta la soo saaro.

(5) Ruqsad macdan soo saarid waxay hoos timaadaa sharcigan qodob kasta oo khuseeya, sida ku cad shuruudaha ogolaashahaan wuxuu dhaqangal yahay muddada loo cayimay oggolaanshaha oo aan ka badnaan Karrin 30 sano;

Qodobka 27

Arji cuboonaysiin macdan soo saarid

(1) Hayste kasta ee ruqsad macdan soo saarid oo danaynaya inuu ka codsado hay'adda ruqsad bixinta cusboonaysiin waa inuu arjigiisa-

(a) U gudbiyaa hay'adda ruqsad bixinta.

(b) Waa inuu arjigu u qoran yahay sida loo tilmaamay.iyo.

(c) Waa inay weheliso khidmada loo cayimay oo aan dib u celin lahayn;

(2) Arji cusboonaysiin ruqsad macdan soo saarid waa inuu-

(a) Sheego sababta iyo muddada uu doonayo in loo cusboonaysiiyo;

(b) Soo raacsiiyo warbixin faahfaahsan oo muujinaysa dhaawaca deegaanka ka soo gaaray howlgaladii macdan soo saaridda, howgaladda la doonayo in lagu dhamaystiro muddada cusboonaysiinta iyo kharashka ku baxaya; iyo

(c) Qorshe howleedka macdan soo saaridda oo faahfaahsan ee la qabanayo muddada cusboonaysiinta;

(3) Hay'adda ruqsad bixintu waa inay ogolaataa arjiga dib u cuboonaysiinta ee ruqsada macdan soo saaridda haddii arjiiluhu buuxiyo shauruudaha ku xusan faqradaha (1) iyo (2), iyo haddii haystaha ruqsada macdan soo saaridda uu ka soo baxay-

(a) Shuruudihii ruqsada sahmninta isla markaana ku xadgudbin Qodobada muhimka aha ee sharcigan; iyo

(b) Qorshe howleed macdan soo saarid;

(4) Ruqsada macdan soo saaridda waxaa la cuboonaysiin karaa mudooyin kale oo aan markiiba ka badnayan 30 sano.

(5) Ruqsad macdan soo saarid haystuhu codsado in loo cusboonaysiiyo way sii jiraysaa tan iyo inta laga ogolaanayo ama laga diidyo, xataa ka dib marka uu

dhamaado mudadii ruqsada ee kowaad.

Qodobka 28

Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha ruqso macdan soo saarid

(1) Ka sokow xuquuqda ku cad qodobka 5aad, haystaha ruqsad macdan soo saarid, iyadoo la xeerinaya qodobka 27aad wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado loona oggolaado dib u cusboonayn ruqsada sahminta ee la xiriirta macdanta iyo aagga sahminta uu ruqsada u haysto;

(2) Haystaha ruqsada macdan soo saaristu waa inuu;

(a) Bilaabaa howgaladda macdan soo saaridda sannad gudahihiis laga bilaabo maalinta ruqsada macdan soo saaridu u dhaqan gasho si waaafaqsan qodobka 26(4) uuna sii wado muddada kororsiimada oo loo golaaday.

(b) Si firfircoon u wado howgaladda macdan soo saaridda si waafaqsan barnaamij howleedka macdan soo saaridda;

(c) Oofiyo shuruudaha ruqsada macdan soo saaridda, ee la xiriirta Qodobada muhiimka ah ee sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka; iyo

(d) Bixiyo Royaltiga dowladda ee la xiriirta macdanta uu

rartay, iskiisna u isticmaalay mudadii ay socdeen howgaladda macdan soo saaridda sida ku cad qodobka 46aad;

Qodobka 29

Arjiga fasaxa iyo muddada ruqsada macdan soo saaridda kooban

(1) Fasax macdan soo saarid kooban waxaa la bixin karaa haddii-

(a) Sida ugu badan loo soo saari karo macdanta laba sano iyo bar gudahood; iyo

(b) Aagga macdanta laga soo saarayo aysan ka badnayn 1.5 hectors.

(2) Qof kasta oo doonaya inuu ka codsado hay'adda ruqsad bixinta, fasax macdan soo saarid kooban waa inuu-

(a) Arji u gudbiyo hay'adda ruqsad bixinta;
(b) Waa inuu arjigu u qoran yahay sida loo tilmaamay, waana inay ku jiraan xogta soo socota;

(i) Arjiilaha Magaciisa dhalshada oo buuxa, meesha uu ku dhasahay, iyo taariikhda dhalashada;

(ii) Macdanta iyo aagga uu arjiilaha macdan soo saarid kooban uu codsaday, oo ay ku jiraan aagga cadastral units haddii arjiiluhu yaqaano;

(iii) Xog kasta oo ay hay'adda ruqsad bixinta ka codsato;

(c) Ay weheliso Khidmad loo cayimay oo aan celis lahayn;

(3) Hay'adda ruqsad bixinta waa inay ogolaataa arji fasax macdan soo saarid kooban haddii -

(a) Shuruudaha lagu soo qaaday farqada 1aad ee qodobkaan uu buuxiyo; iyo

(b) Aanu jirin qof oggolaansho u haysta macdanta ama shidaalka isla dhulkaas ku jira;

(4) Haddii ay dhacdo inaan arjigu buuxin shuruudaha ku cad faqradaas, hay'adda ruqsad bixintu waa inay 14 casho gudahood qoraal ku ogaysiisaa arji keensadaha una celisaa arjigiisa ama arji keensadaha ay siisaa waqti uu kusoo waafajinaya arjigiisa shuruudihii loo baahnaa;

(5) Haystaha fasax macdan soo saarid kooban-

(a) Gelidda dhulka uu fasaxa u haysto isagoo ay wehiliyaan shaqaalihiisa, wuxuuna gayn karaa warshad kasta, aalad kasta, isla markaana wuxuu ka dhisi karaa sagxada iyo dhulka hoostiisaba kaaba

kasta oo ay u baahnaan karaan howgaladda macdan soo saaridda;

(b) Isticmaalidda biyaha durdurrada, harooyinka, webiyada ama togagga laga helo ama mara dhulka ruqsada loo haysto ama ceel kasta oo horay uga qodnaa loona isticmaalo sahminta, macdan soo saaridda, baaritaanka ama soo saarka, sidoo kale waxaa u bannaan qodidda ceel gacmeed ama ceel riig iyadoo loo adeegasanayo howlo la xiriira sahminta, macdan soo saaridda, baaritaanka ama soo saarka;

(c) Bixiyo Royaltiga dowladda ee la xiriirta macdanta uu rartay, iskiisna u isticmaalay mudadii ay socdeen howgaladda macdan soo saaridda sida ku cad qodobka 46aad; iyo

(d) Wuxuuna kala soo bixi karaa macdan aagga ruqsada uu u haysto;

(6) Faasax macdan soo saarid kooban-

(a) Waxaa la isticmaali karaa muddada ku cad fasaxa, oo aan ka badan Karrin mudo dhan labo sano, waxaana la cusboonaysiin karaa mudooyin kale aan ka badan Karrin min labo sano; iyo

(b) Lama wareejin karo, lama bixin karo, lama kireyn karo,

lama sii kireyn karo, waxaase la gelin karaa hafti haddii ujeedaadu tahay in maalgelin lagu samaynayo howlgalka macadan soo saaridda ay hay'adda ruqsad bixinta ogolaatay.

Qodobka 30

Arji fasax ceshiimo

(1) Hayste kasta ee ruqsad sahmin oo doonaya inuu arji ceshiimo ah u qorto hay'adda ruqsad bixinta waa inuu-

(a) Arji u gudbiyaa hay'adda ruqsad bixinta;

(b) Waa inuu arjigu uu gudbiyey u qoran yahay sida loo tilmaamay.

(c) Arjiga uu gudbiyey ay wehilsaa khidmada u cayiman oo aan celis lahayn.

(d) Arjiga ku cad yahay sababta iyo muddada fasax ceshiimo uu codsanayo, iyo.

(e) Warbixin ay ku caddahay inta uu u hogaansanyahay qodobka 31(1).

(2) Hay'adda ruqsad bixinta waa inay bixisa arji fasax ceshiimo haddii-

(a) Uu buuxiyo Shuruudaha lagu soo qaaday farqada 1aad ee qodabkan; iyo

(b) Arjiiluhu uu yahay kan haysta fasaxaan.

Qodobka 31

Oggolaanshaha iyo muddada fasax ceshiimo

(1) Hay'adda ruqsad bixinta waxay ogolaanaysaa fasax ceshiimo haddii haystaha fasaxaas uu-

(a) Sahmiyey aagga uu arjigu Khuseeyo;

(b) Dhammeeyey howgaladda sahminta iyo daraasada suurtagalnimada;

(c) Garowsadey kaydka macdanta ah ee loogu howgeli karo macdan soo saaridda;

(d) Deraasad ku sameeyey suuqa ay leedahay macdantaasi isla markaasna ogaadey in ay leedahay suuq sugan; iyo

(e) Oofiyo shuruudaha fasaxa sahminta, Qodobada muhiimka ah ee sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka ee la xiriirta.

(2) Fasax ceshiimo oo lagu baxshay si waafaqsan faqrad (1) ee qodobkan, wuxuu hakinayaa shuruudihii ruqsad sahminta ee la xiriiray dhulka uu khusayso fasaxa ceshiimo, islamarkaana haddii mudadii sahmintu aanay dhammaan, wuxuu barbar soconaysaa fasaxa ceshiimada.

(3) Fasax ceshiimo waxay dhaqangal tahay muddada ku cad ruqsadaas, oo aysan mudadiiba ka badnaan Karrin sadex sano.

Qodobka 32

Arji cuboonaysiin fasax ceshiimo

(1) Arjiga cusboonaysiinta fasax ceshiimo waa in loo soo gudbiyaa si la mid ah sidii loo tilmaamay arjiga fasaxa ceshiimada ee lagu soo qaaday qodobka 30(1) waana inay ku jirtaa-

(a) Warbixintii ugu damaysey oo ku saabsan xaaladihii dhaqangalay markii la bixiyey fasaxa ceshiimada. Iyo

(b) Muddada iyo sababta loo doonayo cusboonaysiinta.

(2) Fasax ceshiimo waa la cusboonaysiin karaa haddii-

(a) Haystuhu oofiyo shuruudaha fasaxa ceshiimada, ee la xiriirta Qodobada muhiimka ah ee sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka; iyo

(b) Ay weli jirto xaaladii suuqa ganacsiga ee lagu soo qaaday qodobka 31(1) (d).

(3) Fasax ceshiimo waxaa la cuboonaysiin karaa hal mar oo aan ka badnayn labo sano.

Qodobka 33

Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha fasax ceshiimo

(1) Iyadoo la raacayo qodobka (2), haystaha fasax ceshiimo oo keliya ayaa leh xaqa in la siiyo ruqsad macdan soo saarid aagga uu haysto iyo macdanta ku jirta.

(2) Haystaha fasax ceshiimo waa inuu -

(a) Bixiyaa khidmada ceshiimada; iyo

(b) U soo gudbiyaa hay'adda ruqsad bixinta xogta horumarka la gaaray ee lix billoodlaha ah, oo tilmaamaysa-

(i) Inuu weli jiro xaaladii suuqgaynta, sidaa darted uu u doonayo inuu sii haysto fasaxa ceshiimada aagga iyo macdanta ku jirta, iyo.

(ii) Dadaalka uu sameeyey fasax haystuhu si uu u hubiyo in howlgalka macdan soo saaridu bilowdo intaysan ka dhicin muddada uu

cadaynayo qodobka 25(4) ama 27(3) siday ahaataba. .

Qodobka 34

Fasaxa ceshiimada lama wareejin karo

Fasaxa ceshiimada lama wareejin karo, lama bixin karo, lama kirayn karo, lamana rahmi karo. Lama qaadi karo, lama gelin karo hafto ama yarayn, si kastaba ha ahaatee.

Cutubka 4aad; Oggolaanshaha shidaalka

Qodobka 35

Cutubka arji qorashada

Qaybtani waxay tilmaamaysaa oggolaanshaha ruqsadaha baaritaanka iyo wax soo saarka.

Qodobka 36

Casumaada arjiyada

(1) Hay'adda ruqsad bixintu waxay iclaamin kartaa baahin ama casumaad cidii rabta arjiyo baaritaan iyo wax soo saar qayb ama qaybkasta oo dhulka ka mid ah, baahintaas oo ay ku caddahay muddada dhexdeeda laga rabo inay arjigooda ku soo gudbiyaan, shuruudaha iyo xaaladaha lagu mutaysan karo oggolaanshaha arjigaas.

(2) Haddii kale hay'adda ruqsad bixintu waxay si toos ah u qabanaysaa arjiyada baaritaanka iyo wax soo saarka oo la xiriirta qaybaha dhulka ah ee aan casumaada ku jirin sida lagu soo qaaday (1) aad.

Qodobka 37

Codsi ruqsad baaritaan

(1) Qof kasta oo doonaya inuu ka codsado hay'adda ruqsad bixinta, ruqsad baaritaan waa inuu arjigiisa-

(a) u gudbiyaa Haya'da ruqsad bixintai.

(b) Waa inuu arjigu u qoran yahay sida loo tilmaamay, waana inay ku jiraan xogta soo socota:

(i) Haddii arjiiluhu uu yahay shakhsi qof ah;

i. Magaca dhalshada oo buuxa, meesha uu ku dhasahay, iyo taariikhda dhalashada;

ii. Mihnaddiisa iyo;

iii. Meesha uu deggan yahay iyo cinwaankiisa.

(ii) Haddii arjiiluhu uu yahay shakhsi qaanuuni ah;

i. Magaceeda, Jinsiyadda, qaab sharciyeedkeeda, iyo raasumaalkeeda;

ii. Cinwaanka xaruntooda, magaca, cinwaanka iyo wakiilkeeda puntland;

iii. Dokumintiyada soo socda oo wata saxiixa masuul idman ee hay'addaas;

aa. Nuqulo sharciga asaasida shirkado;

bb. Haddii ay jirto Nuqulo warbixintii sanadkii ugu dameeyey ay soo saareen guddiga agaasimayaasha;

cc. Nuqulo xisaab xirka, qiraalka macaashka iyo khasaaraha, warbixinta hantidhowrka, sadexdii sano ee la soo dhaafay haddii ay jiraan;

dd. Liiska magacyada guddiga agaasimayaashaa, oo ay ka muuqato cinwaanadooda iyo jinsiyaddahooda.

ee. Qof kasta oo leh saxiix uu wakiil kaga noqon karo arjiilaha oo la xiriirta howgaladda macdan soo saaridda iyo howlo kale oo puntland kaga xiran;

(iii) Qorshaha, iyo tilmaamidda aagga baaritaanka ee arjiiluhu doonayo ay ku jiraan cadastral units Muhiimka ah.

(iv) Ogolaanshe kale oo arjiiluhu isla waqtigaas ka haysto ama horay uga haysan jiray puntland;

(v) Caddaynta xaalada maaliyadeed, awoodda farsamo, iyo waaya'aragnimada arjiilaha;

(vi) Barnaamij howleedka sahminta iyo kharshka arjiiluhu ku talo jiro inuu galo inta lagu jiro muddada ogolaanshsha, ayna ku jirto caddayn sida arjiiluhu u doonayo inuu helo xogta ama u tarjumayo xogta jirta iyo tan uu ka helo aagga baaritaanka, xilliga ugu horeeya ee howlgalka ka dib oggolaanshaha ruqsadada baaritaanka, xiliga labaadna ay qoditaanka ceelka baaritaanka bilowdo.

(vii) Xog kasta oo hay'adda ruqsad bixintu ka codsato.

(c) Iyo khidmada u cayiman oo aan celis lahayn.

(2) Hay'adda ruqsad bixinta waa inay ogolaataa arji sahmin haddii-

(a) Shuruudaha lagu soo qaaday farqada 1aad qodobkaan uu buuxiyo; iyo

(b) Aanu jirin qof ruqsad u haysta baaritaanka iyo wax soo saar shidaalka ku jira aagga ama qayb ka mid ah.

(3) Haddii ay dhacdo inaan arjigu buuxin shuruudaha ku cad faqradaas, hay'adda ruqsad bixintu waa inay 14 casho

gudahood qoraal ku ogaysiisaa arji keensadaha sababta, una celisaa arjigiisa ama arji keensadaha ay siisaa waqti uu kaga soo kabto kahaladaadkii arjigiisa.

(4) Haddii hay'adda ruqsad bixintu ogolaato arji, waa inay 14 casho gudahood qoraal ku ogaysiisaa laga bilaabo maalinta oggolaanshaha, in arjiiluhu la xiriiro cidda dhulk leh ama kuwa si sharci ah ku haysta, ama cidii kale oo ku lug leh islamarkaana gubiyo go'aanka wadaxaajoodkooda 30casho gudahood laga bilaabo maalinta la oggolaaday.

Qodobka 38

Oggolaanshaha iyo muddada ruqsada baaritaanka

(1) Hay'adda ruqsad bixintu waxay bixinaysaa ruqsada baaritaanka haddii-

(a) Arjiiluhu uu heli karo maaliyadda loo baahanyahay uuna leeyahay awood farsamo uu ku fulin karo howgaladda la rabo si waafaqsan barnaamij howleedka baaritaanka ee la rabo in la fuliyo.

(b) Haddii kharashka ku talagalka ah uu ku filan yahay howgaladda baaritaanka ee qorshaysan iyo muddada barnaamij howleedka baaritaanka;

(c) Arjiiluhu uu leeyahay awood howlgal wax soo saar, oo ku dhisan nidaam ilaalin kara caafimaadka iyo

amaanka shaqaalaha iyo dadwaynaha;

(d) Haddii aan arjiiluhu ku xadgudbayn Qodob muhiim ah oo sharcigan ka mid ah;

(2) Hay'adda ruqsad bixintu waa inay diiddo bixinta ruqsad baaritaan, haddii arjiiluhu uusan buuxin dhammaan shuruudaha ku cad faqrada (1).

(3) Haddii hay'adda ruqsad bixintu diiddo bixinta oggolaansho baaritaan waa inay 30 casho gudahood ku ogaysiisaa ajiilaha qoraal ahaan go'aanka ay gaartay iyo sababaha.

(4) Ruqsada baaritaanka waxay leedahay shuruudo iyo xaalado, waxayna dhaqan gal tahay muddada ugu horaysa kamana badna Shan sano, muddada iyo howgaladda baaritaanka sida caadiga ah waxay u qaybsamaan laba qaybood oo kala ah sadex sano iyo labo sano.

Qodobka 39

Arji cusboonaysiin ruqsad baaritaan

(1) Hayste kasta ee ruqsad shamineed oo danaynaya inuu ka codsado hay'adda ruqsad bixinta cusboonaysiin waa inuu -

(a) Hay'adda ruqsad bixinta u qortaa arji;

(b) Waa inuu arjigu u qoran yahay sida loo tilmaamay; iyo

(c) Waa inay weheliso khidmada loo cayimay oo aan dib

u celin lahayn.

(2) Arji cusboonaysiin ruqsad baaritaan waa inuu-

(a) Sheego sababta iyo muddada uu doonayo in loo cusboonaysiiyo;

(b) Soo raacsiiyo warbixin faahfaahsan oo ah natiijadii sanadkii hore, iyo kharajka ku baxay isla baaritaankaas;

(c) Soo raacsiiyo warbixin faahfaahsan oo muujinaysa dhaawaca deegaanka ka soo gaaray howlgaladii baaritaanka, howgaladda la doonayo in lagu dhamaystiro muddada cusboonaysiinta iyo kharashka ku baxaya; iyo

(d) Qorshe howleedka baaritaanka oo faahfaahsan ee la qabanayo muddada cusboonaysiinta oo tilmaamaya ceelasha la dhisi doono.

(3) Hay'adda ruqsad bixintu waa inay ogolaataa arjiga dib u cuboonaysiinta ee ruqsada baaritaanka haddii arjiiluhu buuxiyo shauruudaha ku xusan faqradaha (1) iyo (2), iyo haddii haystaha ruqsada baaritaanku uu ka soo baxay-

(a) Shuruudihii ruqsada sahmninta islamarkaana ku xadgudbin Qodobada muhimka ah ee sharcigan iyo Sharciyada kale ee dalka; iyo

(b) Qorshe howleed baaritaan.

(4) Ruqsada baaritaanka waxaa la cuboonaysiin karaa ugu badnaan laba goor oo aan ka badnaan markiiba hal sano.

(5) Ruqsada baaritaanka haystuhu codsado in loo cusboonaysiiyo way sii jiraysaa tan iyo inta laga ogolaanayao ama laga diidyo, xataa ka dib marka uu dhamaado mudadii ruqsada ee kowaad

Qodobka 40

Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha ruqsad baaritaan

(1) Ka sokow xuquuqda ku cad qodobka 5aad, haystaha ruqsada baaritaaka. Wuxuu xaq u leeyahay -

(a) Iyadoo la raacayo faqrada (2) wuxuu xaq u leeyahay Inuu codsado loona ogolaado dib u cusboonayn ruqsada wax so saarka ee la xiriirta shidaalka iyo aagga baaritaanka uu ruqsada u haysto;

(b) Iyadoo la raacayo qodobka 39, wuxuu xaq u leeyahay Inuu codsado loona ogolaado cuboonaysiin ruqsada baaritaanka oo la xiriirta shidaalaka iyo aagga ee uu ruqsad u haysto;

(c) Iyadoo la raacayo qodobka 24aad wuxuu xaq u

leeyahay inuu la baxo isticmaalana muunado shidaal kasta oo uu soo saarideeda ruqsad u haysto lagana helo aagga ruqsada muddada baaritaanka socdo; iyo

(d) lyadoo la raacayo qodobka 55aad, Wuu wareejin karaa ama bannayn karaa ruqsada baaritaanka.

(2) Haystaha ruqsada baaritaanka waa inuu-

(a) Sii aan kala go'lahayn oo firfircoon u wado howgaladda baaritaanka ee lagu oggolaaday barnaamij howleedka baaritaanka;

b) Oofiyo shuruudaha ruqsada baaritaanka, Qodobada muhiim ah ee sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka;

(c) Xukuumadda puntland siiyo khidmaha loo cayimay ee ruqsada baaritaanka;

(d) Bixiyo Royaltiga dowladda ee la xiriirta shidaalka muunada uu rartay , iskiisna u isticmaalay mudadii ay socdeen howgaladda baaritaanka sida ku cad qodobka 46aad; iyo

(e) Bilaabaa howgaladda baaritaanka 90 casho gudahood laga bilaabo maalinta ruqsada baaritaaku u dhaqan gasho ama muddada lagu daray oo ay ogolaatay hay'adda ruqsad bixinta si waaafaqsan qodobka 21(4) uuna sii wado muddada kororsiimada

oo loo golaaday.

Qodobka 41

Arji wax soo Saar

(1) Qof kasta oo doonaya inuu ka codsado hay'adda ruqsad bixinta, ruqsad wax soo Saar waa inuu arjigiisa geeyaa -

(a) Haya'da ruqsad bixinta u gudbiyaa arji;

(b) Waa inuu arjigu u qoran yahay sida loo tilmaamay, waana inay ku jiraan xogta soo socota;

(i) Haddii arjiiluhu uu yahay shakhsi qof ah;

i. Magaca dhalshada oo buuxa, meesha uu ku dhasahay, iyo taariikhda dhalashada;

ii. Mihnadiisa iyo;

iii. Meesha uu degen yahay iyo cinwaankiisa.

(ii) Haddii arjiiluhu uu yahay shakhsi qaanuuni ah;

i. Magaceeda, Jinsiyadda, qaab sharciyeedkeeda, iyo raasumaalkeeda;

ii. Cinwaanka xaruntooda, magaca, cinwaanka iyo wakiilkeeda puntland;

iii. Dekumintiyada soo socda oo wata saxiixa masuul idman ee hay'addaas;

aa. Nuqulo sharciga asaasida shirkada;

bb. Haddii ay jirto Nuqulo warbixintii sanadkii ugu dameeyey oo ay soo saareen guddiga agaasimayaasha;

cc. Nuqulo xisaab xirka, qiraalka macaashka iyo khasaaraha, warbixinta hantidhowrka, sadexdii sano ee la soo dhaafay haddii ay jiraan;

dd. Liiska magacyada guddiga agaasimayaashaa, oo ay ka muuqato cinwaanadooda iyo jinsiyaddahooda ;

ee. Qof kasta oo leh saxiix uu wakiil kaga noqon karo arjiilaha oo la xiriirta howgaladda wax soo saaridda iyo howlo kale oo puntland kaga xiran;

(iii) Ogolaanshe kale oo arjiiluhu isla waqtigaas ka haysto ama horay uga haysan jiray puntland;

(iv) Caddaynta xaalada maaliyadeed, awoodda farsamo, iyo waaya'aragnimada arjiilaha;

(v) Muddada uu oggolaanshaha u raadinayo;

(vi) Tafaasiisha khayraadka la hubiyey, qiyaasay, iyo sifooyinka dhabta ah iyo kuwa kiimiko, farsamo ee khayraadka shidaalkaas.

(vii) Sifaha iyo qorshaha aagga ku tala galka macdan soo saaridda oo u degsan cabir sax

ah oo tilmaamaya baraha muhulmka ah ee ku jira xuduuda aaggaas iyo masaafooyinka ay isu jiraan, oo lagu xaqiijiyey sahan xuduudeed oo rasmi ah isla markaana muujinaya calaamadaha muhiimka ah, dhismayaasha, samayska dhulka, iyo tilmaamaha dhuleed, oo ay ka mid yihiin cadastral unit hadi ay jiraan.

(viii) Barnaamijka Horumarrinta ee howgaladda wax soo saarka, iyo xog kasta oo ay u baahato hay'adda ruqsad bixinta;

(ix) Daraasada suurtagalnimada oo timaamaysa qiyaasta heerka iibinta, dakhliyada, raasumaalka iyo kharashka howlgalka, qiimadhaca iyo kharashyada laga goynayo, qiyaasta macaashka iyo socsocodka lacagta;

(x) Barnaamijka shaqaalaynta iyo tababarada oo kooban ;

(xi) Tafaasiisha kaabayaasha loo baahan yahay;

(xii) Warbixinta qiimaynta saamaynta deegaanka, haddii ay codsato hay'adda ruqsad bixinta;

(xiii) Xogta kale oo ay hay'adda ruqsad bixintu codsato. .

(c) Waa inay weheliso khidmada loo cayimay oo aan dib u celin lahayn.

(2) Hay'adda ruqsad bixinta waa inay ogolaataa ariji wax soo saarid haddii-

(a) Uu buuxiyo shuruudaha lagu soo qaaday farqada 1aad ee qodobkaan; iyo

(b) Aanu jirin qof oggolaansho u haysta baaritaan shidaal ama soo saarid, isladhulkaas uu arjiga u qortay.

(3) Haddii ay dhacdo inaan arjigu buuxin shuruudaha ku cad faqradaas, hay'adda ruqsad bixintu waa inay 14 casho gudahood qoraal ku ogaysiisaa arji keensadaha una celisaa arjigiisa ama arji keensadaha ay siisaa waqti uu kusoo waafajinaya arjigiisa shuruudihii loo baahnaa;

(4) Haddii hay'adda ruqsad bixintu ogolaato arji, waa inay 14 maamood gudahood qoraal ku ogaysiisaa laga bilaabo maalinta oggolaanshaha, in arjiiluhu la xiriiro cidda dhulka leh ama kuwa si sharci ah ku haysta, ama cidii kale oo ku lug leh islamarkaana soo gubiyo go'aanka wadaxaajoodkooda 30 casho gudahood laga bilaabo maalinta la oggolaaday.

Qodobka 42

Oggolaanshaha iyo muddada ruqsada wax soo saarka

(1) Hay'adda ruqsad bixintu waxay bixinaysaa ruqsada wax soo saarka haddii-

(a) Arjiiluhu uu heli karo maaliyadda loo baahanyahay uuna leeyahay awood farsamo uu ku fulin karo sida ugu badan howgaladda barnaamijka wax soo saarka;

(b) Haddii kharashka ku talagalka ah uu ku filan yahay howgaladda wax soo saarka ee qorshaysan iyo muddada barnaamij howleedka wax soo saarka;

(c) Wax soo saarku uusan keenayn diiqow hawo aan la aqbali Karrin, buburin ecological, ama waxyeelo u gaysan deegaanka;

(d) Arjiiluhu uu leeyahay awood howlgal wax soo saar, oo ku dhisan nidaam ilaalin kara caafimaadka iyo badbaadada shaqaalaha iyo dadwaynaha;

(e) Haddii aan arjiiluhu ku xadgudbayn Qodob muhim ah oo sharcigan ka mid ah.

(f) Arjiiluhu fuliyey shuruudihii looga baahnaa ee ruqsad baaritaan. Iyo

(g) Shidaalka loo soo saarikaro sida ugu badan ayna ku

caddahay barnaamijka howlgalka wax soo saarka.

(2) Hay'adda ruqsad bixinta waa inay diiddo bixinta ruqsad wax soo saarka, haddii arjiiluhu uusan buuxin dhammaan shuruudaha ku cad faqrada (1).

(3) Haddii hay'adda ruqsad bixintu diiddo bixinta oggolaansho wax soo saar waa inay 30 casho gudahood ku ogaysiisaa ajiilaha qoraal ahaan go'aanka ay gaartay iyo sababaha.

(4) Ruqsada wax soo saarku waxay leedahay shuruudo iyo xaalado, waxayna dhaqangal tahay muddada ku cad ruqsada, halkii mudona aysan ka badan Karrin 20sano**.** .

(5) Oggolaansho ruqsad wax soo Saar oo la xiriirta farqada (1) aad, waxay dhaqangal tahay maalinta la soo saaray.

Qodobka 43

Arjiga cusboonaysiinta ruqsada wax soo saarka

(1) Hayste kasta ee ruqsad wax soo saar oo danaynaya inuu ka codsado hay'adda ruqsad bixinta cusboonaysiin waa inuu geeyaa arjigiisa-

(a) Hay'adda ruqsad bixinta;

(b) Waa inuu arjigu u qoran yahay sida loo tilmaamay, iyo.

(c) Waa inay weheliso khidmada loo cayimay oo aan dib u celin lahayn. .

(2) Arji cusboonaysiin ruqsad wax soo saar waa inuu-

(a) Sheego sababta iyo muddada uu doonayo in loo cusboonaysiiyo;

(b) Soo raacsiiyo warbixin faahfaahsan oo ah natiijadii wax soo saarka, iyo kharajka ku baxay isla waxsoo saarkaas oo qeexan;

(c) Soo raacsiiyo warbixin faahfaahsan oo muujinaysa dhaawaca deegaanka ka soo gaaray howlgaladii wax soo saarka, iyo baaxada howgaladda dib u kabashada deegaanka ay tahay in la dhamaystiro iyo kharashka ku baxaya; iyo

(d) Qorshe howleedka wax soo saarka oo faahfaahsan ee la qabanayo muddada cusboonaysiinta.

(3) Hay'adda ruqsad bixintu waa inay ogolaataa arjiga dib u cuboonaysiinta ee ruqsada wax soo saarka haddii arjiiluhu buuxiyo shauruudaha ku xusan faqradaha (1) iyo (2) iyo haddii haystaha ruqsada wax soo saarku uu ka soo baxay -

(a) Shuruudihii ruqsada wax soo saarka islamarkaana ku xadgudbin Qodobada muhiimka ah ee sharcigan iyo Sharciyada kale ee dalka;

(b) Qorshe howleed wax soo saar; iyo

(c) La oggolaaday waajibaadka ka saaran maaraynta deegaanka ee barnaamijka howgaladda.

(4) Ruqsad wax soo saar waxaa la cusboonaysiin karaa mudooyin kale, oo aan markiiba ka badnaan Karrin shan sano.

(5) Ruqsad wax soo saar ee arijigeeda cuboonaysiinta la soo gudbiyey, xitaa haddii waqtigeedii dhacay, waa dhaqan gal inta arjigaas laga ogolaanayo ama la diidayo.

Qodobka 44

Xuquuqda iyo waajibaadka haystaha ruqsad wax soo saar

(1) Ka sokow xuquuqda ku cad qodobka 5aad, haystaha ruqsada wax soo saarka wuxuu xaq u leeyahay -

(a) Iyadoo la raacayo faqrada (2) wuxuu xaq u leeyahay inuu codsado loona ogolaado dib u cusboonayn ruqsada wax so saarka ee la xiriirta shidaalka aagga uu ruqsad u haystey;

(b) Wuxuu xaq u leeyahay inuu la baxo isticmaalana shidaal kasta oo uu helay inta uu waday howgaladda wax soo saarka; iyo

(c) Iyadoo la raacayo qodobka 55aad, Wuxuu wareejin karaa ama bannayn karaa ruqsada wax soo saarka.

(2) Haystaha ruqsada wax soo saarku waa inuu-

(a) Si aan kala go'lahayn oo firfircoon u wado howgaladda wax soo saarka ee lagu oggolaaday barnaamij howleedka wax soo saarka;

(b) Oofiyo shuruudaha ruqsada wax soo saarka, Qodobada muhiim ah ee sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka.

(c) Bixiyo Royaltiga dowladda ee la xiriirta shidaalka muunada uu rartay , iskiisna u isticmaalay mudadii ay socdeen howgaladda wax soo saarka sida ku cad qodobka 46aad; iyo

(d) Bilaaba howgaladda wax soo saarka hal sano gudaheed laga bilaabo maalinta ruqsada wax soo saarku ay dhaqan gasho ama muddada lagu daray oo ay ogolaatay hay'adda ruqsad bixinta si waaafaqsan qodobka 42(5).

Qodobka 45

Hurumarrinta bar kayd ee shidaalka

Haddi dhul loo haysto ruqsad baaritaan ama wax soo saar uu

qayb ka yahay isla kayd shidaal oo loo haysto ruqsad baaritaan ama wax soo saar oo kale, haystayaasha xuquuqdaasu waa inay diyaariyaan qorshe lagu horumarrinayo kaydkass mid walba inta gaar ahaantiisa ugu aaddan ayna u bandhigaan qorshayaashaas hay'adda ruqsad bixinta si ay oggolsaansho uga helaan ayada oo loo raacayo shuruudaha u yaal ruqsad kasta gaar ahaanteeda.

QAYBTA SHANAAD
XEERARKA GUUD EE ANSIXINTA ROYALTISKA, CASHUURAHA, IYO KHIDMADAHA (ss46-71).

Cutubka1aad. Arimaha dhaqaalaha

Qodobka 46
Royaltiska Qaranka.

(1) Haystaha ruqsad wuxuu bixinayaa royaltiga dowladda ee ku salaysan macdanta iyo shidaalka uu la soo baxay, hantidiisana ku darsaday.

(2) Inta royalatiga laga qaadayo macdanta iyo shidaalka ruqsad haystuhu la soo baxay, waxaa loo jaangoynayaa qaabka soo socda.:

(a) Heerka royalatiga ee shayga laga hadlayo oo lagu dhuftay qiimaheeda iibka ee isku jira (gross); ama

(b) Boqolayda (%) ka mid ah wax soo saarka maalinlaha ah; ama

(c) Ha isugu jiro (a) iyo (b).

(3) Heerka royalatiga iyo qaabka la adeegsanayo sida ku qeexan (2) waxaa cayimaya hay'adda ruqsad bixinta ama oggolaanshaha la xiriirta.

(4) Haddii hay'adda ruqsad bixintu u cayimto heerka royalatiga sida ku cad qodobka (3), waxay hay'adu wax ka bedeli kartaa inta ay cayimtay, iyadoo siinaysa fursad ay ruqsad haystaha ra'yigooda ku dhiibanayaan, wax ka bedilida la damacsan yahay.

(5) Royalatiga waxaa lagu bixinayaa lacag cadaan ah guud ahaan, haseyeeshee hay'adda ruqsad bixinta marmarka qaarkood qoraal ahaan waxay ugu wargelin karta ruqsad haystaha in mid ama ka badan royalatiga lagu bixinayo badeecad ahaan ee macdanta ama shidaalka la soo saaray, haddii hay'adda ruqsad bixintu ku wargeliso haystaha in royaalatiga qaarkood lagu bixinayo badeecad ahaan, waxaa inta la bixinayo ku salaysnaanaysaa qiimaha caalamiga ah ee macdanta ama shidaalka uu joogo maalinta ay bixinta taaggantahay.

(6) Royalatiga waxaa la bixinayaa sadexdii biloodba mar ama mudadii kale ee ku cad oggolaanshaha**.**

Qodobka 47

Cashuuraha.

(1) Iyadoo la raacayo faqrada (2)(3) ama (4) haystaha iyo dadka la xiriirta howlgalkaas waxaa ku waajibay cashuuraha puntland, oo ay ku jiraan.

(a) surface tax;

(b) Cashuurta dakhli qofeedka;

(c) Cashuurta dakhli shirkadeedka;

(d) Cashuurta furdooyinka iyo kuwa la midka ah;

(e) Cashuurta macaash macaashka iyo la midka ah; iyo

(f) Cashuur kasta oo kale, lavy ama khidmadaha ay soo saaraan golaha wakiiladu marmarka qaarkood.

(2) Hay'adda ruqsad bixinta waxay oggolaansho kasta ka dhaafi kartaa cashuuraha puntland ee ku taxan qodobka (1), iyadoo la tashanaysa wasaarada maaliyadda.

(3) Haystaha ruqsad cid kasta oo uu siiyo qandaraas waxaa ku waajibaya inay bixiyaan cashuurta soo dejinta (iimporrt duties), ee qalabka, matoorada, baabuurta, iyo alaabta dayactirka ee ay ula soo degaan howlgaladooda, dhammaan alaabta la soo dejiyey dib ayaa loo dhoofin karaa iyadoo laga dhaafayo cashuurta dhoofka.

(4) Ruqsad haystuhu wuxuu dhoofin karaa cashuur la'aan macdanaha iyo shidaalka uu soo saaray ee la socda oggolaanshaha.

(5) Golaha wakiiladu waxay soo saari karaan cashuur inta lagu jiro howgaladda macdanta iyo shidaalka. Parliament may, in due course, promulgate a Minerals and Petroleum Operations Taxation Act.

Qodobka 48

Khidmadaha

Ruqsda haystuhu wuxuu bixinayaa khidmadaha la xiriirta arjiga uu ku codsanayo oggolaanshaha, kan cusboonaysiinta, wareejinta iyo wixii la mid ah, inta khidmadu noqonayso iyo qaabka loo qaadayo waa la qeexi doonaa.

Qodobka 49

Kirooyin

Ruqsda haystuhu waa inuu sanad kasta horumaris ahaan u bixiyaa kiro ku salaysan baaxada dhulka loo oggolaaday, inta kiradu noqonayso waa la qeexi doonaa.

Qodobka 50

Dhiirigelinta horimarrinta

Heerarka royaltiga iyo kirooyinka ee lagu qeexi doono ka hoos Qodobada 46 iyo 49 ee sharcigan, waa inuu noqdaa mid dhiirigelinaya maalgelinta khayraadka macdanta iyo shidaalka.

Qodobka 51

Ilaalinta Sarifka

(1) Haystaha soo saaraya macdan ama shidaal dhoof-gelikara wuxuu;

(a) Ka furanayaa Koonto lacagta qalaad ah bank Somalia ah si waafaqsan xeerarka bank-yada Somalia.

(b) Wuxuu ku shuban karaa xisaabo uu ka furto bangiyo dibada ah qayb ka mid ah lacagaha qalaad ee soo gala waxaana loo isticmaali karo, arimaha soo socda,

(i) Soo dejinta qalabka lagama maarmaanka ah ee howgaladda;

(ii) Adeegyada iyo kirooyinka ay tahay in lagu baxsho lacag qalaad iyadoo la raacayo heshiisyada horay loo galay;

(iii) Gudida dulsaarka daymanka si sharci ah ay ugu leeyihiin hay'ado dalka dibadiisa ah;

(iv) Magdhowyo ay tahay in la siiyo shaqaalaha ajnabiga ah oo si joogta ah aan u degenayn soomaliya;

(v) Howgaladda kale ee ka qayb qaata socodsiinta iyo kor u qaadida ee la xiriirta howgaladda.

(2) Haystaha ruqsad soo saarid macdan iyo shidaal dhoofgal ah, wuxuu xawilan karaa lacago ah cumlada maalgashiga ama cumlad kale oo laysla oggolaaday iyadoo la waafajinayo heerka sarifka ee isla waqtiga xawilaadu dhacayso;

(a) Macaashka iyo saamiga ku soo aada uuna helo haystaha ruqsada ama saamilha;

(b) Daymaha dibada iyo dulsaarkooda;

(c) Khidmadaha, royalatiga, iyo lacagaha kale ee ku baxa ka faaidaysiga tiknoolajiyada iyo heshiisyada maaraynta ee la xiriirta howgaladda;

(d) Lacagaha ka soo baxa iibinta hanti kasta ay ku jirto walxaha la xaraashay ama howgaladda uu yareeyey maalgashade ajnabi ah ama shirkado si ku tala gal ah ama ay keentay kicid. iyo

(e) Lacagaha laga helo iibka, wareejin saamiyo, wadaag qayb ama dhammaan howgaladda ruqsad haystaha, ee uu maalgashaday qof ama shirkad wadani ah.

(3) Shaqaalaha ajnabiga ah e howgaladda, waxay ku xawilan karaan mushaharkooda iyo lacagaha kale ay ka helaan shaqada si waafaqsan xeerarka sarifka lacagaha qalaad ee soomaliya.

Qodobka 52

Equity Participation by the Government of Puntland

Hay'adda ruqsad bixinta waxay ku xiri kartaa shuruudo oggolaansho kasta oo ku soo baxay si waafaqsan sharcigan in haystuhu;

(1) In haystuhu Xukuumadda puntland ku wareejiyo dulsaar u dhigma ilaa 10% qiimaha ruqsada iyadoo wax kharsh ah

aan loo raacanayn xukuumadda puntland, lagase rabo haystaha ama dhinac kale uu soo jeediyo haystuhu, hay'adda ruqsad bixintuna ogolaato;

(2) U hibeeyo iyadoo la raacayo shuruudo ay isla ogolaadeen haystaha, hay'adda ruqsad bixinta iyo xukuumadda puntland, dulsaar dheeraad ah oo fuula ama saami qaybsi lagu yeelanayo haystaha ama dhinac kale uu soo jeediyo hay'adda ruqsad bixintuna ogolaato, si biirinta macaashka ama saami qaybsiga dowladu ay ku yeelanayso haystaha ama dhinac kale uu u gaaro ugu badnaan 30%.

Cutubka 2aad: Arimaha Maamulka.

Qodobka 53

Joogtaynta xafiis iyo wakiil

(1) Haddii aan si kale oggolaansho ka helin hay'adda ruqsad bixinta, ruqsad haystuhu waa inuu ku yeeshaa xafiis puntland dhammaan muddada odolaanshaha.

(2) Ruqsad hayste kasta oo aan ahayn shakhsi qof ah waa inuu xafiis ku leeyahay puntland muddada oggolaanshaha iyo wakiil rasmi ah waxayna ku soo wargelinaysaa hay'adda ruqsad bixinta sugnaanta qofkaas iyo bedelkiisa haddii ay dhacdo;

Qodobka 54

Qaabka kala doorashda arjiyada

(1) Haddii hay'adda ruqsad bixinta ay soo gaarto in ka badan

hal arji oggolaansho aag macdan ama shidaal oo isku mid ah, Arijiyadaas waxaa loo eegayaa siday u hala horayeen.

(2) Marka la kala dooranayo arjiyo isku taariikh soo gaaray, hay'adda ruqsad bixinta waxaa mudnaanta yeelanaya arjiga ay keensadeen dad soomaali ah.

Qodobka 55

La kala wareegida iyo ishortaagida ruqsadaha sahaminta iyo macadn soo saaridda

(1) Haddii aanay shuruudo si kale u tilmaaman, oggolaansho ama dan ku xiran isla oggolaanshahaas lam bixin karo, lama wareejin karo, lama kirayn karo, lama sii kirayn karo, laysuma wakiilan karo, laysma hortaagi karo, dayn laguma qaadan karo, lays kama qaadi karo, siyaabo kalena looma yeelan karo haddii aan oggolaansho qoraal ah laga helin hay'adda ruqsad bixinta.

(2) Oggolaanshaha ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, waa in la bixiyo haddii la wareegaha, kiraystaha, sii kiraystaha, loo wakiishaha, ama qofka loo wareejinayo ama yeelanayo uu-

(a) Karti u leeyahay inuu fuliyo kana soo bixi karo waajibaadyada iyo shuruudaha oggolaanshahaas; iyo

(b) Haduu oofin karo shuruudaha lagu soo qaaday qodobka 21, 26, 37, iyo 41, hadba kii loo baahan yahay.

(3) Oggolaanshaha ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan, waa in la bixiyo haddii sharcigani ogolyahay encumbrance ama Haftayn, ayna lagama maarmaan u tahay si lacag ama maalgelin loogu helo howgaladda ay khusayso.

Cutubka 3aad: Isticmaalka dhulka iyo kaabayaasha

Qodobka 56

Kaabayaasha horay u jiray iyo wadaagga kaabayaasha

(1) Hayste wuxuu isticmaali karaa kaabayaasha jira ee aagga oggolaanshaha iyo meelaha u dhow aaggaas haddii aysan isticmaaliddaasi hor istaaggayn howlo dad horay u isticmaali jiray ama kuwa hada loo oggolaaday.

(2) Hay'adda ruqsad bixinta waxay ku xiri karaa haystaha inuu gacan ka gaysto kana qayb qaadato dhinaca maalgelinta dhismayaasha iyo gacan ku haynta kaabayaal ay wada isticmaalaan hayste kale ama qof kasta oo ku sugan aagga oggolaanshaha ama soohdints u dhow aagga oggolaanshaha, haddii hay'adda ruqsad bixinta u aragto in wada isticmaalka kaabayaashaas ay faa'iido ugu jirto dhinacyada danaynaaya oo dhan, Meelaynta kharashka dhismaha iyo gacan ku haynta adeegyadaas waxaa goynaaya hay'adda ruqsad bixinta iyadoo ku salaynaysa heerarka isticmaalidda Dhinacyada kala gedisan.;

(3) Hay'adda ruqsad bixinta waxay fari hartaa haystaha inuu u ogolaadao dad kale isticmaalka kaabayaasha haystaha, haddii ay hubaal tahay inaanayn hor iistaaggayn howgaladda haystaha, hay'adda ruqsad bixinta waxay ku xukumi kartaa isticmaalid kasta oo aan ahayn haystaha khidmad uu siinayo haystaha haddii isticmaalka kaabayaasha ay ka damayso dan ganacsi. Khidmad kasta waxay ku xiran tahay heerka isticmaalka, khidmad kasta oo noocaas ah marka laga tago amarka hay'adda ruqsad bixinta haystaha ruqsadu wuxuu leeyahay xaq mudnaansho oo siinayo isticmaal buuxa.

(4) Haddii ay jiraan xaalado deg deg ah xukuumadda puntland, waxay haystaha fari kartaa inuu u ogolaado qof kasta ama xukuumadda puntland inay si kumeel gaar ah u istimaalaan kaabayaasha haystaha, iyadoo lagu xirayo oo keliya magdhow u dhigma waxyeelo soo gaarta kaabayaasha oo ay ku jirto lumid wax soo saar.

Qodobka 57

Socodsiinta howgaladda

(1) Haystuhu waa inuu howlgalka u fuliyaa si taxadar iyo hufnaan isagoo isticmaalaya teknoloojiyada ku habboon iyo howgaladda wanaagsan ee aagga macdanta ama shidaalka, iyo nidaamka caadiga ah ee caalamka looga dhaqmo ee howgaladda macdan soo saarista iyo shidaal ee ku habboon.

(2) Haystuhu waa inuu fuliyaa dhammaan barnaamij howleedka, iyo kharashaka ku waajibay ee la xiriirta indhaindhaynta, sahminta, macadn soo saarista iyo baaritaanka, haddii aysan jirin ka bixid haystuhu sabaeeyey uuna ka helay oggolaansho ku cad qoraal oo ay bixisay hay'adda ruqsad bixinta.

(3) Haystuhu waa inuu howlgalka u fuliyaa qaab ka taxadaraya caafimaadka iyo amaanka dhammaan dadka u shaqeeya, shaqaale iyo cid kaleba, iyo yaraynta dhaawaca iyo waxyeelada deegaanka.

(4) Haystuhu waa inuu u fuliyaa howlgaladiisa si waafaqsan xeeraraka iyo tilmaamaha kasta ee la xiriirta.

Cutubka 4aad: Arimaha deegaanka.

Qodobka 58

Mabaadi'da Maareynta daaegganka

Howlgalkasta waa in loo fuliyo si waafaqsan mabaad'ida guud ee laysku raacsan yahay ee horumarka joogtaysan iyadoo qorshaha iyo fulinta howgaladdaas lagu darayo arimaha bulshada, dhaqaalaha iyo deegaanka si loo hubiyo in ka faa'idaysiga khayraadka macdanta iyo shidaalku u adeegayo maslaxada faca maantay iyo kan mustaqbalka;

Qodobka 59

Bixinta maaliyadda ka soo kabashada dhawwacyada deegaanka gaara

Hay'adda ruqsad bixinta waxay ku xiri kartaa arjiilaha oggolaansho, inta aan la ogolaan oggolaansho inuu bixiyo

kharash ama dammaanad bank ama mid kale, si loo hubiyo waajibaadyada mustaqbalka fuuli kara arjiilaha oo la xiriirta dib u soo noolaynta aagga oggolaanshaha inta howlgaldu socdaan ama markay dhamaadaan, shuruudaha dammaanada waxaa goynaya hay'adda ruqsad bixinta.

Qodobka 60

Caafimaadka, amaanka iyo dhowrista deegaanka

(1) Haystaha oggolaansho waa inuu wakiiladiisa iyo shaqaalihiisa siiyo dhar shaqo oo ku habboon iyo qalab laysku ilaaliyo, waana inuu hubiyo inay helaan tababaro iyo barnaamijyo waxbarasho oo sax ah, islamarkaana ay aqoon u leeyihiin inay u fuliyaan howgaladda looga baahanyahay si dhab ah, habaysan, isla markaana aan dhibaato ka soo gaarayn.

(2) Haystaha oggolaansho waa inuu diyaariyo adeegyo caafimaad iyo daawayn oo u dhigma heerka iyo dabeecada howgaladda, waana inuu raaco talabooyinka lagama maarmaanka ah oo si badbaada leh oo taxadar leh loogu fulinayo howgaladda wareejinta, kaydinta, iyo gacan ku haynta isticmaalka walxaha qarxa iyo kiimikooyinka.

(3) Haystaha oggolaansho waa inuu markiiba ogaysiiyaa hay'adda ruqsad bixinta dhacda kasta oo keenta dhimasho ama dhaawac, ama waxyeesha hanti, deegaanka ama howgaladda, waxaana islamarkiina la

qaadayaa talaabooyinka lagama maarmaanka ah ee wax ka qabashada natiijada ka dhalata xaaladaas.

(4) Ka hor inta aysan dhammaan ama la burin ruqsad, hayste oggolaansho waa inuu hubiyaa in marimada dhulka hoostiisa ah, godadka iyo wax kastoo kale oo halisi ka imaan karto.

(5) Haystaha oggolaansho waa inuu aagga oggolaanshaha ku sameeyo dib u habayn, soo kabasho ama diyaarrin wax ku ool ah, si inta aanu dhammaan ama la burin oggolaanshaha aaggaasu u noqdo mid lagu sameeyey dib u habayn, soo kabasho, ama diyaarrin dhamaystiran oo suurta gelinaysa ka faa'idaysi mustaqbal oo waxtar ah, haddii aan hay'adda si qoraal ah ku cadayn in qayb ama gebi ahaanba howgaladdaas, aan dhaqaale ahaan la qaban Karrin.

(6) Haystaha oggolaansho macdan soo saarid kooban waa inuu qaado dhammaan talaabooyinka badbaadinta deegaanka ee u dhiganta howgaladdaas; gaar haan waa inay dib u buuxiyaan godadka islamarkaana dhirna ay beeraan, waana inayan howgaladda u isticmaalin maadada Mercury iyo wax kasta oo la mid ah.

(7) Haystaha waa inuu dhamaadka ama burinta oggolaansho ku wareejiyo xayndaab, ilaaliyana, si qancisa hay'adda ruqsad bixinta, god kasta iyo meelha kale oo laga shaqeeyo oo ka mid ah aagga oggolaanshaha si aanu halis u gelin caafimaadka, nolosha, iyo hantida dadka.

Qodobka 61

Shaqaalayn, tababarka, iyo dalabka adeega gudaha

(1) Haystaha ogolaashahu waa inuu mudnaan siiyaa shaqaalaynta wadaniyiinta reer puntland iyo soomaaliya, haddii shakhsiyaadkaasu ay leeyihiin xirfadaha ama aqoonta farsamooyinka. .

(2) Haystaha ogolaashahu waa inuu mudnaan siiyo badeecadaha iyo adeegyada dalka gudihiisa laga helo, haddii lagu helayo sicir la tartami kara suuqyada dibada islamarkaana ay tayo ahaan u dhigmaan.

Cutubka 5aad: Joojinta howgaladda

Qodobka 62

ku meelgaarnimada Dhismayaasha

(1) Dhammaan dhismayaasha haystaha ee la xiriirta ruqsada, sahminta, macdan soo saaridda, baaritaanka ama wax soo saarka waxay ahaanayaan kuwa kumeelgaar ah waana in la suuliyo inta aanu dhammaan ama la burin oggolaansho.

(2) Dhammaan dhismayaasha joogtada ah ee uu ku talaabsado haystuhu waa inuu suuliyo marka la gaaro dhamaadka ama burinta.

(3) lyadoo aan loo eegin faqrada (1), hay'adda ruqsad bixintu waxay si qoraal ah ku ogaysiin kartaa shardiga ah inuu haystuhu dhiso dhismayaal joogta ah ama uu meeshooda

kaga tago dhismayaal kumeelgaar ah, ka dib markuu dhamaado ama uu buro ogolaanshuhu, kuwaas oo ay la wareegayso xukuumadda puntland iyadoo aan wax kharsh ah kaga bixin.

(4) Iinkasta oo uu jiro faqrada (2), hay'adda ruqsad bixinta waxay si qoraal ah ku ogaysiin kartaa haystaha inaanu suulin dhismayaal joogta ah, marka la gaaro dhamaadka ama burida oggolaansho, kuwaas oo ay la wareegayso xukuumadda puntland iyadoo aan wax kharash ah ku bixin.

(5) Marka la gaaro dhamaadka ama burida oggolaansho, xukuumadda puntland waxay haystaha ogaysiinaysaa iyadoo u maraysa hay'adda ruqsad bixinta damaceeda ah inay kula wareegayso hantida guurtada ah ee loo adeegsado howgaladda sicir la mid ah kii laga baxshay iyadoo aan loo eegin qiimadhaca isticmaalka isla hatidaas, sida ku cad buugaga xisaabaadka ee haystaha, haddii xukuumadda puntland aysan 90 casho gudahood ka dib dhicitanka ama burinta oggolaanshaha ku siin lacagaha uu yeeshay haystuhu, wuxuu xaq u yeelanyaa inuu siiyo cid kale si waafaqsan Sharciyada lagu dhaqmo.

(6) Xukuumadda puntland iyadoo aan waxa kharash ah kaga bixin waxay la wareegi kartaa hanti kasta aanu haystuhu cid kale ka gadin mudo sanad gudihiis ah ka dib marka uu dhamaado amd la buriyo heshiiska, ama waxay ku xiri karta haystaha inuu hantidaas ka qaado aagga ogolaashahana dib u habayna ku sameeyo.

Qodobka 63

Dhamaadka xaq, oggolaansho, iyo ruqsad

(1) Oggolaansho kasta oo lagu bixiyey si waafaqsan sharcigan waa dhacayaa, markasta oo-

(a) La gaaro dhamaadka muddada;

(b) Marka haystuhu dhinto isla markaan aanu jirin qof dhaxal suge u ah;

(c) Shirkad ama shirkado isu tegey diiwaanka looga saaro si waafaqsan sharciga islamarkaana aanu jirin arji la gaarsiiyey hay'adda ruqsad bixinta oo lagu waydiisanayo oggolaansho waafaqsan qodobka 55aad ee sharcigan amaba la diiday codsigaas;

(d) Haystaha laga xaraashay ama lagala wareegey;
(e) Loo briyo si waafaqsan qodobka 64aad; ama
(f) Laga baaqsado.

Qodobka 64

Awoodda laalida ama burinta xuquuqda oggolaanshooyinka ama oggolaanshaha ee hay'adda ruqsad bixinta

(1) Iyadoo la raacayo faqrada (2) (3) iyo (4), hay'adda ruqsad bixinta way burin kartaa am laali kartaa oggolaansho kasta haddii haystuhu-

(a) Uu ku talabsado howlgalo ka soo horjeeda sharcigan;

(b) Haddii uu ku xadgudbo shuruudaha heshiiska;

(c) Haddii uu bixiyo macluumaad aan hubaal ahayn, khaldan ama wax lagu jaahwareeriy lana xiriirta xogta uu sharcigani farayo inuu soo gudbiyo,

(2) Inta aan laga falcelin arimaha ku xusan faqrada (1) ee qodobkan, hay'adda ruqsad bixinta waa inay-

(a) Ogasiin qoraal ah siiso haystaha oo u tilmaamaysa inay ku tala jirto laalida ama burinta xaq uu leeyahay;

(b) Cadayso sababaha keenay inay kutala jirto laalid ama burin xaq;

(c) Waa inay haystaha siiso fursad macquul ah uu ku tusaalayn karo sababta aanay ahayn in la laalo ama la buriyo oggolaanshaha; iyo

(d) In ay ogaysiiso cidda haftada leh in hay'adu ku tala jirto laalida ama burinta xaq ama oggolaansho.

(3) Hay'adda ruqsad bixinta waa inay u tilmaantaa haystaha siyaabaha uu qaadi karo, talaabooyin uu ku saxayo xadagudubka ku tumasho ama guuldaro.

(4) Haddii haystuhu uusan raacin tilmaamaha ku xusan

faqrada (3) ee qodobkan, hay'adda ruqsad bixinta way ka falcelin kartaa arimaha ku xusan faqrad (l), ka dib marka-

(a) Ay siiso haystaha fursad macquul ah oo qareenimo ah; iyo

(b) Ayna tixgeliso qareenimadaas

(5) Hay'adda ruqsad bixinta waxay qoraal ku ogaysiin kartaa haystaha ka noqoshada laalida xuquuqda; haddii haystuhu-

(a) Ka soo baxo tusaalooyinka tilaamaha wata ee lagu soo qaaday farqada (3) ee qodobkan; ama

(b) Soo bandhigo sababo madhaafaan ah oo u qiil bixin kara in laga noqdo laalida.

Cutubka 6aad: Xadidaada isticmaalka dhulka qaarkiis

Qodobka 65

Xadidaada ama mamnuucidda sahminta iyo macdan ka soo saarid dhulka qaarkiis

(1) lyadoo la raacayo faqrada (2) ee qodobkan, oggolaansho lama bixin karo haddii.

(a) Dhul ku jira aag la deganyahay;
(b) Jid kasta ee shacabku isticmaalo, jid train ama qabuuro;

(c) Dhul kasta ay isticmaalaan dadwaynaha ama xukuumadda puntland danaheeda ama u xirmaysan sharci kasta oo jira, ama

(d) Aagga ay tilmaantay hay'adda ruqsad bixinta una soo bandhigtay dadwaynaha (ogoysiintaas waxay noqon kartaa mid aan khusayn aagga oggolaanshaha).

(2) Waxaa dhici karta in oggolaansho la bixiyo dhulka lagu soo qaaday faqrada (1) ee qodobkan haddii hay'adda ruqsad bixinta ay ku qanacdo taasoo –

(a) La tixgeliyey Horumarrinta joogtada ah ee macdanta ama khayraadka shidaalka ah ee ku jira, iyo danaha shacabka puntland, iyadoo danaynaysa ayay bixinaysaa oggolaansho;

(b) Howlgaladu noqonayaan kuwa ku dhisan qaabka Horumarrinta joogtada ah; iyo

(c) Bixinta oggolaanshaha noocaas ah aysan ka hor imaan Karrin danaha hayste oggolaansho jirta;

Cutubka 7aad: Isticmaalka dhulka

Qodobka 66

Bixinta magdhowyada xaaladaha qaarkood

(1) Haystuhu waa inuu ka taxadaraa, inuusan dhexgal ku samayn cid kasta oo sharci u haysataha aagga oggolaanshaha;

(2) Inkasta uu jro qodabada muhiimka ah ee farqada (1), Haddii nidaamka iyo muddadada uu haystuhu ku fulinayo howgaladda ay u baahato in cid sharci u haysata laga qaado, haystuhu waa inuu isku dayaa inuu kala xaalo bixinta magdhow ku aadan soo celinta iyo banaynta aagga oggolaanshaha, haddii uu diiddo ka bixida ama magdhowga la bixinayo, hay'adda ruqsad bixinta waa inay ka saartaa cidda ku jirta oggolaanshaha ayna goysaa magdhow ku habboon oo la siinaya cidda sharciga u lahayd oo laga qaadayo.

(3) Haystuhu waa inuu, haddii uu waxyeelo, dhaawaco ama burburiyo dhisme ama hanti kasta ee cid sharci u haysata aagga oggolaanshaha ama dhulka ku dhegan, siiyaa magdhow u dhiganta waxyeelada, burburinta, iyo dhaawaca, ay labada dhinaca isku raaceen ama sida ay goysey hay'adda ruqsad bixinta.

Cutubka 8aad: Diiwaangelinta

Qodobka 67

Diiwaangelinta ogolaanshaha

Hay'adda ruqsad bixinta waa inay samaysaa diiwaangelin, ay tahay inay ku jirto tafaasiisha codsiga oggolaansho kasta sida ku cad sharcigan ama ka dib Siinta/diidmada oggolaanshahaas iyo

shuruudaha la xiriirta, Aalad kasta oo ku jirta oggolaanshaha, wareejinta, xilsaaridda, tanaasulida, yaraynta ama sidii kaleba waa in loo bandhigaa si loo diiwaangeliyo hay'adda ruqsad bixinta 90 casho gudahood, ama inta loo oggolaaday, ama haddiise kale waxay noqonaynayaa waxba kama jiraan, hay'adda ruqsad bixinta waa inay ku haysaa diiwaangelinta tafaasiisha aaladaas iyo haynta go'aan kasta oo laga qaadayo oo saamaysey shuruudaha oggolaanshaha, Xafiiska diiwaangelintu waa inuu u furan yahay dadwaynaha xilliyada macquulka ah.

Cutubka 9aad: Xogta.

Qodobka 68

Xogta iyo warbixinta

(1) Haystuhu waa inuu ku hayaa muddada oggolaanshaha:

(a) Xogta iyo isbedeleda asbuucii ee la xiriirta howgaladda, qaybaha shaqaalaha, xaalada shaqo iyo shillalka, caddada macdanta ama shidaalka la soo saaray, xafiday, diyaariyey, daabulay, ama la dhoofiyey ay weheliso caddada qalabka, machinada, iyo qalabka kale oo hanti muuqata ah..

(b) Walxaha iskumidka ah, haraagga, iyo muunadaha la kala qaybiyey ee macdanta ama shidaalka laga qaadayo aagga oggolaanshaha iyo nuqulada macluumaadyada, cilmibaarista kale, farsamada iyo warbixinada kale ee la xiriirta macdanta iyo shidaalka

aagga oggolaanshaha, marka laga reebo muunadaha isku midka aha ee la qaadayo marka la ilaalinayo tayada macdaneed ee howgaladda macadn soo saaridda;

(2) Haystaha ruqsad sahmin, baaritaan ama indhaindhayn waa inuu u soo gudbiyaa hay'adda ruqsad bixinta warbixin ay ku qorantahay horumarka howgaladda iyadoo la raacayo barnaamijka howgaladda ee ku aadan, taasoo ah xog la kaydiyey, iyo tarjumidihii macdanaha iyo shidaalka laga qaadayo goobta howgaladda iyo xogaha kale ee looga baahaday.

(3) Haystaha macdan soo saarid ama wax soo saar waa inuu u gudbiyaa hay'adda ruqsad bixinta (Calender) afar biloodle ah, 30 casho gudahood marka ay dhamaato tii hore, warbixino koobaya waxyaalahan

(a) Dhammaan howlgalaga ayna ku jiraan nooca shaqo ee jiyoolojiyadeed, horumarka iyo natiijada wehelisa, iyo shuruudaha la xiriira soo saaridda macdanaha ama shidaalka sida ku habboon iyo isbedel kasta ee kaydka ama khayraadka.

(b) Wadarta maalmaha shaqada ee qaybaha shaqaalha, iyo xaalada shaqo iyo shilalaka;

(c) Cadada macdanaha iyo shidaalka la soo saaray, xafiday, diyaariyey, daabulay, iibiyey, dhoofiyey, meesha loo diray iyo jinsiyadda iibsadayaasha wax kasta oo la dhoofiyey iyo qiimaha laga heley iibsashooyinka..

(d) Cadada qalabka, matoorada ama ashyaada hantida muuqata ah, iyo isbedel kasta; iyo

(e) Warbixinada kale oo ay si macquul ah u codsato hay'adda ruqsad bixintu.

(4) Haystaha ruqsad macdan soo saarid ama wax soo saar waa inuu u soo gudbiyaa hay'adda ruqsad bixinta warbixin sanadle ah 30 casho gudahood dhamadka sanadkaas, wabixintasi waa inay noqotaa mid koobaysa macluumaadka uu soo gudbiyey si la mid ah faqrada (3)aad ee qodobka kore

Qodobka 69

Xogta iyo macluumaadka

(1) Haystaha oggolaansho waa inuu xafiiska u diiwaangashan oo uu ku leeyahay Puntland ama goobta shaqada ee Puntland uu ku xafido diiwaanno, diiwaangelin habaysan oo la xariira hawlgallada muhimka ah iyo natiijooyinkooda iyo kharashyada la xariira, iyo sidoo kale macluumaadka ceelasha.

(2) Qofna ma qaadan karo mana baabi'in karo diiwaan ama macluumaad ceel haddii aanu jirin amar qoraal oo ka soo baxay madaxda hay'adda ruqsad bixinta ee awoodda u leh.

Qodobka 70

Awoodda hay'adda ruqsad bixinta ee la xariira gudbinta xog iyo macluumaad gaar ah

(1) Hay'adda ruqsad bxintu si ay guduato xilalka uu siiyay sharcigani, waxay awood u leedahay inay amar qoraal ku weydiisato xog ama macluumaad gaar ah -

(a) Arjiile oggolaansho;

(b) Oggolaansho hayste kasta, ama

(c) Hantiile kasta ama qof kasta oo si sharciya ku deggan dhul ka mid ah aag oggolaansho isla markaasna ah arjiile oggolaansho.

Qodobka 71

Bandhigidda xogta

(1) Iyadoo la raacayo faqradda (2), xog iyo macluumaad kasta oo lsgu bixiyo si waafaqsan qodobbada 68 ama 69 waa loo bandhigi karaa qof kasta:

(a) Haddi xogtaas ama macluumaadkaas hore loo faafiyay, ama

(b) Haddii xuquuqda, fasaaxa iyo oggolaanshaha xogtaas lagu helay uu dhacay ama la buriyay, ama aaggi ay khuseeyaan xuquuqdaasi ama

oggolaanshoyadaas laga tegey ama laga baxay.

(2) Qofna looma bandhigi karo xoq ama macluumaad haddii ay ku jiraan xog ama macluumaad sir u ah ciddii bixisay xogtaas ama macluumaadkaas.

(3) qof kasta oo bixinaya xog ama macluumaad, si waafaqsan qodobbada 68 ama 69 waa inuu hay'adda ruqsad bixinta u tilmaamo xogta ama macluumaadka sir ah ee aan la bandhigi Karrin.

(4) Xukuummada Puntland iyo hawlwadeennadooda midokoodna:

(a) Uma qoolna xog iyo macluumaad ay ku heleen si waafaqsan sharcigan oo si niyad sami ah ama ka fiirsasho la'aan ku baxay;

(b) Dammaana qaadi mayo sugnaanta iyo dhammaanshaha isla xogtaas iyo macluumaadkaas iyo fasiraaddoodaba.

QAYBTA LIXAAD

DHAQAN GELINTA SHARCIGAN (ss 72-80)

Qodobka 72

Kormeer joogtaysan

Qof kasta oo hay'adda Ruqsad Bixintu u egmato saacadaha

shaqada xafiisyada, asagoo oo wax oggolaansho oo qoraal ah wadan wuxuu u bannaan inuu:

(1) Tago aag oggolaansho ama goob kasta oo ay ka socdaan sahmin, macdan soo saarid, ama baaritaan ama wax soo saar si uu u kormeero hawl kasta ama hawlgal kasta oo ka socda gudaha ama agagaarka aag ama goob; iyo

(2) haystaha oggolaansho ama qof mas'uul ka ah aaggaas ama goobtaas ama qof kasta oo fulinaya ama masu'uul ka ah fulinta hawlo, ama hawlgal oo uu ku amro inuu soo hordhigo diiwaan, raad-raac, qiraal ama qoraallo kasta oo ay ku jiran kuwa eletroonik ah, xog iyo macluumaad la xariira arrima shrcigani xeeriyey in la kormeeri karo, amaba inuu helo nuqullo ama xigasho, iyo

(3) Ka baaraandego aalad kasta, shey ama walax kasta oo laga helo aaggaas kana qaato muunado ka dibna uu baaro kalana hubsado waxa ay kala yihiin.

Qodobka 73

Awaamiir, hakin iyo tusaalooyin

Haddii hay'adda Ruqsad Bixintu ogaato inuu jiro xadgudub ama ay tuhunto inu jiro xadgudub, ama ka baaqsasho in loo hoggaansanaado:

(1) Qodob ka mid ah sharcigan, ama

(2) Shuruudihi oggolaansho ama sharci hoosaad waafaqsan sharcigan oo ka dhacay aag oggolaansho ama goob ay ka socdaan hawlgallo, hay'adda ruqsad bixintu waxay awood u leedahay inay:

(a) Ku amarto haystaha oggolaanshaha, ama qofka mas'uulka ka ah aaggaas, ama qof kasta oo wada ama masu'uul ka ah hawlaha ama hawlgallada amaba ah maareeye, hawlwadeen sare, shaqaale in la qaado tallabooyin saxitaan; ama

(b) Amar ku bixiso in hawlgallada la hakiyo ama la soo afjaro, iyo inay siiso tusaalayn kale oo lagama maarmaan ula muuqda;

Qodobka 74

Is-hortaag, xannibaad ama ka-hor-imaansho qof idman

Qofna isma hortaagi karo, ma xannibi karo kamana hor imaan karo qof idman, oo gudanayo waajibaadyadiisa ama uu fushanayo awoodihiisa iyo xilalka sharcigani waafaqsan.

Qodobka 75

Racfaan qaadashada iyo habraaca hortegidda maxkamadaha

(1) Qof kasta oo xuquuqdiisa ama filashooyinkiisa xaqa ah ay wax u dhinmeen ama ay dhibaato ka soo gaartay go'aan maamul oo loo cuskaday sharcigan wuxuu racfaan u

qaadan karaa wasiirka asaga oo ka dacwoonayaa go'aan maamul oo uu qaatay mas'uul u idman dhammaan ama qayb ka mid ah awooddaha hay'addaha ruqsad bixinta .

(2) Racfaan la xariira faqradda (1) ma hakin karo go'aan maamul, haddii aan wasiirku hakin.

(3) Qofna racfaankiisa uma gudbin karo maxkamad haddii aanu ka quusan inaanu xaqsoor ku helayn si waafaqsan qodobkan.

Qodobka 76

Xalinta khilaafaadka

(1) Hay'adda ruqsad bixintu way ka baaraandegi kartaa, go'aanna way ka gaari kartaa khilaafaad ka dhex taaggan haystayaal, iyo sidoo kala khilaafaad u dhexeeya haystayaal iyo dhinacya saddexaad oo la xariira xuquuq ka dhalatay oggolaansho ama isla sharcigan. Hay'adda ruqsad bxintu waxay leedahay awood inay goyso magadhowga dhinac ku yeelanayo dhinac kale isla maarkaana ay dhaqan geliso.

(2) Go'aan ay hay'adda ruqsad bixintu gaartay si waafaqsan faqrada (1), racfaan maxkamadda awoodda u leh ka garniqidda arrinta la isku hayo waa laga qaadan karaa lixdan (60) beri gudahood.

(3) Hay'adda ruqsad bixinta ayaa leh awoodda maamulidda, ka afqaadida, inta aan la gaarrin heer maxkamadeed.

(4) Oggolaansho wuxuu xeerin karaa in:

(a) Khilaaf kasta, isqabad kasta ama isqaannabid kasta oo dhex marta Xukuumadda Puntland ama hay'adda ruqsad bixinta iyo hayste lana xariira oggolaansho ama sharcigan iyo fasiraaddisa, xadgudub ama joojin, sida ugu suurtagalsan waxaa loogu dhammaynayaa qaab wan-waaneed.

(b) Haddii ay dhacdo in khilaaf, isqabad ama isqaannabid lagu xallin waayo hab waan-waaneed, khilaafka waa loo irkanayaa garsoor iyadoo la raacayo habraaca ay u dejisay hay'adda ruqsad bixintu. Haddii arrintu herkaas gaarta go'aanka hay'adda garasoorka waa in labada dhinacba u hoggaansamaan.

Qodobka 77

Dembiyada heerka kowaad

(1) Cid kasta oo

(a) Ku dhaqaaqay hawlgalo isaga oo aan helin oggolaanshaha dhab ah;

(b) Sameeya qiraalo been abuuris, ama marrin habaabin ah, ama si qalooc ah, arji la xiriira sharcigan. Iyo

(2) Ruqsad haysta kasta oo

(a) Howlgaladiisa u fuliya si aan xilkasnimo ahayn, ama si wayn isugu lada ama gala khalad ku tala gal ah.

(b) Gala xadgudubyo mar ka badan oo la xiriira waajibaadka ka saran dhowrista deegaanka, caafimaadka, iyo amaanka hawlgalada;

(c) Ku guul daraysta wax mar ka badan si la taaban karro waajibaadkaiisa maamulka iyo dhaqaalaha,

Wuxuu galay dembiyada heerka kowaad.

Qodobka 78

Dembiyada heerka labaad

(1) Ruqsad haystaha:

(a) Ku guul daraysta inuu sugo buugta ama xogaha ama qoraalada kale ama alaabta loo baahan yahay ama sugo buugaag ama xogo aan alaabtoodu dhamaystirayn ama khaldan yihiin,

(b) Ku guul daraysta inuu xafido warbiximaha ama qoraalada ama ogaysiin bixin waaya;

(c) U fuliya hawlgalada qaab dayacaad ah ama hab khatar gelin kara caafimaadka ama amaanka qofka, deegaaanka ama kaydka, ku guul daraysta inuu raaco qaabka wanaagsan ee macdan soo saariad ama qaabka wanaagsan ee shidaal soo saariad guud ahaan, ama ku guul daraysta inuu raaco waajibaadka oggolaanshaha.

(d) Ku guul daraysta inuu bixiyo lacagaha ay leedahay Dawladda Puntland.

(e) ku guul daraysta inuu ogolaado sarkaal ka tirsan hay'adda ruqsad bixinta oo leh awoodda buuxda inuu galo aagga oggolaanshaha ama ama goobaha kale ee hawlgalada, ama buugaagtiisa (teeda), xogta, ama qoraalada kale ama waxyaalaha la xiriira, ama ku guul daraysta inuu u filiyo amar sharci ah ama uu faray sarkaalkaasi. Wuxuu noqon doonaa dembiile galay dembiyada dhexe;

Wuxuu galay dembi heerka labaad.

Qodobka 79

Dembiyada Maamul

(1) Ruqsad hayste kasta oo;

(a) Ku guul daraysta inuu sugo buugta ama xogaha si dhamaystiran, oo joogtaysan saxna ah, marka laga reebo arimo qabya ah ama sidooda u khaladan;

(b) Ku guul daraysta inuu waqtiga ku habboon gudbiyo warbixinaha ama decumintiyada kale ama sida loo rabo u wargeliyo;fails in a timely manner to file all reports or other documents or give notices as required;

(c) Ku guul daraysta inuu howgaladda u fuliyo si sax ah oo maangal ah ama uu ilaaliyo xeerarka iyo awaamiirta, hjase ahaatee aan halis gelin caafimaadka iyo amaanka dadka, deegaanka, ama kaydka;

Wuxuu galay demdi maamul.

Qodobka 80

Ciqaabaha

(1) Markay dhacaan tuhumo la xiriira dembi heerka kowaad, heerka labaad ama dembi maamul, hay'ada ruqsad bixintu waxay qaadi kartaa talaabooyinka ku cad qodobada 64, iyo 73.

(2) Ciqaabaha fal denbiyaad heerka kowaad ah iyadoo la raacayo qodobka 77aad ee sharcigan waxay noqon karaan xukun ganaax ama xarig gaari kara labo sano;

(3) Ciqaabaha fal denbiyaadka heerka labaad ah iyadoo la raacayo qodobka 78aad ee sharcigan waxay noqon karaan xukun ganaax ama xarig gaari kara mudo hal sano ah. Haddii ay dhacdo in dhinaca ay khusayso aanu qaadin talaabooyin sixitaan, kadib marka hay'ada ruqsad bixintu ogaysiiso denbiyada uu galay, ganaaxii lagu xakumay wuu laba jibaarmayaa;

(4) Haddii haystuhu ay khusayso uu qaado talaabooyin dib u sixitaan, ka dib marka hay'ada ruqsad bixintu ay ogaysiiso

inuu galay denbiyo maamul wax ganaax ah uu bixinayaa ma jiraan. Hadaanu talaabo saxitaan qaadin wuxuu mutaysan karaa ganaax;

(5) Haddii fal u dhigma denbiga heerka labaad ama maamul uu soo noqnoqdo hay'ada ruqsad bixintu waxay u kala aqoonsan kartaa danbi heerka kowaad ama heerka labaad, sidaas awgeedna waxay kala yelanayaan ciqaabaha ay kala leeyihiin;

QAYBTA TODOBAAD

XEERAR IYO qodobo KALE OO qubane ah

(ss81-90)

Qodobka 81

Xeer hoosaadyo

(1) Wasiirku wuxuu samayn karaa xeer hoosaadyo la xiriira .

(a) (i) Ilaalinta deegaanka halka ama meelaha u dhow goobaha hawlaha macdantu ka socoto ama agagaarkooda;

(ii) Maaraynta raadka ka hara hawlgalada macdan soo saaridda ay uu ku samayso deegaanku ama goobaha u dhow meelaha hawlaha macdan qodistu ka socoto;

(iii) Dayactirka meelaha dhulka dushiisa oo ay wax gaaran kuwaasoo la xiriiray hawgalada sahminta ama macdan soo saaridda;

(iv) Ka hortagida, xakamaynta iyo la dagaalanka diiqawga hawada, dhulka ama biyaha, oo ay ku jiraan biyaha dhulka hoostiisa mara, haddii diqowgaasu la xirriro hawlgalada sahminta ama macdan soo saaridda;

(b) Soo saaritaanka, safeynta, isticmaalka ama qaadida macdan kasta ;

(c) Dejinta hab raacyada loo marayo racfaan qaadshada uu sharcigani tilmaamay, iyadoo la dhawrayo codsiyada ku xiran sharcigan;

(d) Khidmadaha ay tahay in la bixiyo ee la xiriira xaq, ama fasax lagu baxshay si waafaqsan sharcigan;

(e) Khidmadaha ay tahay in la bixiyo ee la xiriira rafcaan kasta oo lagu soo qaaday sharcigan;

(f) Qaabka uu yeelanayo arji kasta oo ay tahay in la qabto/fuliyo si waafaqsan sharcigan, iyo qiraalada ama decumintiyada laga rabo in la soo raaciyo arjiga, macluumaadka iyo faahfaahinta ay waajib tahay in ay la socoto arjigan;

(g) Qaabka ay yeelanayaan, shuruudaha, soo

saaritaanka, cusboonaysiinta, ka bixida, hakinta, burinta, oggolaansho kasta ama decumintiyo ay tahay in la soo saaro, la dammaanad qaaday, la oggolaaday, si waafaqsan sharcigan;

(h) Qaababka diiwaanada. Kaydka xogta, ogaysiinta, naqshada qorshaha, ama macluumad ay tahay in la hayo/meel la dhigo, la bixiyo, la shaaciyo ama loo gudbiyo si waafaqsan sharcigan;

(j) Xadidaadaha, ama habaynta la xiriirta daabulida ama isticmaalka khayraad macaadeed ama shidaal guud ahaan;

(k) Caafimaadka, iyo amaanka dadka hawlgallada wada, iyo talaabooyinka lagu baabi'inayo, xakamaynayo, yaraynayo khataraha halis gelin kara caafimaadka iyo amaanka;

(l) Xaaladaha la xiriirara mishiinada culus, qalabka ama alaabaha la taaggayo ama loo isticmaalayo hawlgalada;

(m) Shuruudaha isticmaalka saxa ah, gacan ku haynta, kala saaridda, kaydinta, rarida, iyo daabulida walxaha khatarta ah ee loo isticmaaly hawlgalada iyo haraagga halkaa ka soo baxda;

(n) Qaadista, gacan ku haynta, kaydinta, iyo isticmaalka ashyaada qaraxda iyo isku darida walxaha si walxo qarxa looga sameeyo laguna hawlgalo;

(o) Ilaalinta qalabka, dhismayaasha, ilaha biyaha, iyo oogada dhulka iyo siyaabaha ay tahay in loo isticmaaloi qalabka, dhismayaasha, ilaha biyaha, ama oogada dhulka iyo diidista, xakamaynta, rakibida qalab iyo dhismayaal, iyo isticmaalka ilaha biyaha ama oogada dhulka u dhow goobaha shaqada ee hawlgaladu ka socdaan;

(p) In la sugo amaanka dhulka godadka macdanta iyo khataraha la xiriira boholaha dhaadheer, qashin qubyada haraagga iyo dambaska, iyo nooc kasta oo dhismayaal ah oo la sameeyo inta ay socdaan hawl galadu ama howgaladdaas;

(q) Heerarka guriyaynta ama nafaqaynta shaqaalaha degan goobaha macdanta;

(k) Arrin kasta oo ay tahay ama ay waajib tahay in lagu cayimay, si waafaqsana sharcigan, ama

(l) Arrin kasta oo kale oo xeer u samayntoodu ay lagama maarmaan u tahay gaaritaanka ujeedooyinka sharcigan;

(2) Xeer hoosaad kasta oo loo cuskaday qodobkan wuxuu u soo jiidi karaa cid kasta oo ku xadgudubta ama ku guul daraysta inay fuliso, waxay gashay dambi waxayna mutaysanaysaa xukun ah ganaax ama xarig mudo aan ka badnayn lix bilood;

Qodobka 82

Kaabayaasha shidaalka iyo howgaladda shidaal soo saarka

(1) Gebi ahaanba kaabayaasha si toos ah ama dadban loogu isticmaalay hawlgalada shidaalka ee hada ku yaal Puntland, oo ay ku jirto aanse ku koobnayn hantida wax soo saarika, naqaynta, dhoofinta, dhigista tuubooyinka (valve stations, pump stations, compressor stations and wixii kale oo qalab ah, qaybinta ay ku jirto goobaha iyo dhismayaasha waxaa dusha ka eegi doona ama maamuli doona hay'adda ruqsada bixinta si ay kor ugu qaado soo saaridda shidaalka Puntland.

(2) Dhammaan Howgaladda shidaal soo saarka, ay ka mid yihiin safaynta, daabulida, kaydinta, iyo soo saarka walxaha ka farcama waxaa maamulaya hay'adda ruqsad bixinta.

(3) Dhammaan kaabayaasha ku tilmaaman faqrada (1) ee qodobkan waxaa isticmaali kara, iyadoo la raacayo sharcigan, Xumuumada federaalka kumeelgaarka ah iyo dhammaan gobolada kale ee waxs oo saarka lah, si loogu faa'ideeyo dhammaan shacabka soomaaliya.

(4) Dhuumaha shidaalka ee muhimka ah waxaa isticmaali kara cid kasta oo si sharci ah uga wada soomaliya howlgalo shidaal, iyadoo ay ku xiran tahay oggolaanshaha hay'adda ruqsad bixinta iyo shuruudo ku cad heshiis la wada galo.

Qodobka 83

Isdhaafsiga decumintiyada

(1) Haynta, siyaabaha kale ee ku tilmaaman sharcigan, ogoysiin kasta, dalbida, Haddii aan sharcigu si kale u sheegin, ogaysiin, amar, tilmaan, ama decumenti kasta oo kale ee loo baahan yahay iyadoo sharcigan la raacayo in lays dhaafsado ama cid la siiyo waa in lagu talo galo in si dhab ah laysugu gudiyo ama laysa siiyo, haddii...jahaynta ama decumentiyada la xiriirta sharciga oo ay tahay in la gudbiyo ama la siiyo qof kasta, waa in loo tixgeliyaa in loo gudbiyey si sax ah; haddii -

(a) Cidda ay khusayso gacanta looga saaray; ama

(b) Loogu diro cinwaan diiwaangashan qofka ama cidda ay khusayso meheradii ugu damaysey ee lagu ogaa, ha ahaato boostada ama cinwaanka hoygiisa.

(2) Ogoysiin, dalab, tilmaan ama decumenti kasta oo kale oo ku soo baxday si waafaqsan sharcigan waa dhaqangal haddii la mariyo shuruudaha kor ku xusan, qaab kasta ha lahaato ama qofka soo saaray ama cadeeyey ha ahaado mid aan awood u lahayn, haddii ay dhacdo in awooddaas dib laga siiyey isla masuulkaas.

Qodobka 84

Wakiilashada qandaraasle

Haddii hayste ogolansho u wakiisho gof ama qandaraasle inuu uga shaqeeya aagga oggolaanshaha, haystaha ayaa masuul ka ah fulinta sharcigan;

Qodobka 85

Wax ka bedilida xuquuqda, fasaxyada, barnaamijyada iyo qorshayaasha

Oggolaansho, barnaamij howlgal baaritaan, howlgal wax soo saar, barnaamij howlgal sahmin, ama barnaamij howlgal macdan soo saarid, lama bedeli karo (gaar ahaan fidinta baaxada bedka ama ku darid macdano aan awal ku jirin ama lakb dhuleed cusub IWM ee aan oggolaanshaha ku jirin) iyadoo aan oggolaansho qoraal ah laga helin hay'adda ruqsad bixinta.

Qodobka 86

Mulkiile dhul ama cid ku degen si sharci ah oo aan la heli Karrin

(1) Haddii arjiile oggolaansho, ay ahayd inuu ogaysiiyo lana tashado mulkiilaha dhulka ama qofka sharciga u haysta oo codssigaasi khuseeyo gaar ahaan meelaha sharcigani kusheeyo, waa inuu ogaysiiyo hay'adda ruqsada bixinta in mulkiilaha dhulka ama cidda si sharci ah ku degan dhulka ay khusayso.

a) Aan la helii karrin, ama

b) Uu dhintay, islamarkaana aan la heli Karrin qof kale uu si sharci ah ugu wareegay.

2) Marka uu arjiile si qoraal ah u codsado uuna bixiyo khdmada oggolaanshaha arjigaas, hay'adda ruqsad bixinta waxay awood u leedahay;

a) Inay u Ogolaato qofkaas inuu meel muuqata oo dhulkaas ka mid ah ka taago calaamad uuna galo dhulka uu arijigaasi Khuseeyo iyo

b) Inay qofkaas oglaysiiso shuruudaha kale oo ay goy'so hay'adda ruqsad bixinta.

Qodobka 87

Dhaafitaanka qodobo ka mid ah sharcigan

(1) Hay'aad kasta oo dowladeed ama bulsho waxaa laga dhaafay shuruudaha helitaanka oggolaanshaha oo la xiriira macdan la qaadayo si loo dhiso wado, biyo xireen, ama howl kale oo ay wado wasaaradi lagamana rabo wax kharash ah, hase ahaatee hay'adda ruqsad bixinta waa in la gaarsiiyo wargelin hor-u-dhac ah oo la xiriirta howshaas.

(2) mulkiilaha dhulka ama cidda si sharci ah u degen, haddii ay dhulkaas ka qaado, dhagax, dhagax waaweyn,

quruurux, ama dhoobo si ay u samayso beero, dhisme guryo, ama hagaajin kale oo dhulkaas lagu samaynayo, waa laga dhaafayaa shuruudaha helitaanka oggolaanshaha wax kharash ahna laga qaadimaayo haddii aan ciidaas, dhagaxaas, qarkaas, quruuruxaas, ama dhoobadaas aan laga iibinayn ama la siinayn cid kale.

Qodobka 88

Caddaynta xaqiiqada

Eedayn kasta ee la xiriirta dhaqan gelinta sharcigan, waa inay ku salaysan tahay qiraal, macluumaad, xog, ama qorshe uu galay ama uu bixiyey dhinaca la eedaynayo, oo uuna si cad u soo bandhigo dhinaca wax eedaynaya;

Qodobka 89

U qoolnaanta Xukuumadda Puntland

Xukuumadda Puntland way u qoolan tahay sharcigan marka laga reebo dembi qof shakhsi ahaan u galay.

Qodobka 90

Qodobada Ku-Meelgaarka ah

(1) Heshiis kasta Macdan ama shidaal,, qandaraas shaqo, ruqsad ama oggolaansho ay xukuumadda puntland ama (WTM) la gashay dhinac sadexaad, ka hor dhaqangalka

sharcigan, wuxuu loo aqoonsanayaa oggolaansho rasmi ah muddo sanad ah oo ka bilaabanta dhaqangelidda sharcigan ama muddo intaa ka badan haddii Wasiirku ku iclaamiyo si ogaysiin guud ah, Muddadaas iyad ah dhinaca sadexaad ee dhinac ka ah heshiis macdan ama shidaal, qandaraas shaqo, ruqsad ama oggolaansho wuxuu yeelanayaa xuquuqda ama waajibaadka hayste oggolaansho la mid ah oo waafaqsan sharcigan.

(2) Cid kasta oo dhinac ka ah heshiis, ama qandaraas, ama hayste nooc kasta oo ruqsad ah ama oggolaansho ku xusan faqrada (1) ee qodobkan wuxuu yeelanayaa xaq u gaar ah muddo sanad gudihiis ah ka dib dhaqangalka sharcigan oo ku gaysan karo arji waafaqsan sharcigan oo la xiriirta khayraad shidaal ama macdaneed iyo dhulka uu Khuseeyo hashiiska, qandaraaska, ruqsada ama oggolaanshaha horay loo siiyey.

Qodobka 91

Dhaqangalka sharcigan

(1) Sharciaga waxaa lagu magacaaggaa, sharciga Horumarrinta khayraadka Macdanta iyo shidaalka.

(2) Sharciagan wuxuu dhaqangalayaa Taariikhda ay xukuumadda puntland ansixiso isla markaan la faafiyo.

(3) Sharcigani wuu ka sareeyaa sharci kasta, xeer ama tilmaan la xiriirta arimaha la midka ah ama kudhow, hase ahaatee

haddii ay suurtagal tahay in sharciyadaas, xeerarkaas, ama tilmaamahaas waxaa la siinayaa fasiraad waafaqsan sharcigan.

(Qiimaha Arjiyada waxaa soo goyn doona Wasaarada macadanta iyo Shidaalkas ee Puntland)